Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

**Tariikh: 07/09/2023**

**Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.138**

ARW - BIXIT
11 SEP 2023
OPM - EXIT

**XEERKA: Habraaca Maamulka Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraasyada.**

**Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha ahna Ra'iisul Wasaare ku-Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

**Markuu arkay:** Warqadda summadeedu tahay **WM/XWD-1153/23/** ee ku taariikheysan 6 September 2023 kuna saabsan soojeedinta ku-simaha Wasiirka ahna Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda.

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.46.09.23** ee **07/09/2023,** kuna saabsan ansixinta **Habraaca Maamulka Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraasyada** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Markuu tixgeliyey:** Muhiimadda ay leeyahay meel-marinta Habraaca Maamulka Guddiga iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraasyada

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

**Wuxuu Meel-mariyey:**

**Qodobka 1[aad]**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.46.09.23 07/09/2023,** kuna saabsan Habraaca Maamulka Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraasyada oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

**Qodobka 2[aad]**

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Habraaca Maamulka Guddiga iskudhafka Wasaaradeed.

**Qodobka 3[aad]**

Xeer-nidaamiyaha Habraaca Maamulka Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee waxa Uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA ☆ XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA ☆ FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA ☆ OFFICE OF THE PRIME MINISTER

**Mudane, Saalax Axmed Jaamac**
**Ku simaha Ra'iisul Wasaaraha ahna Ra'iisul wasare ku xigeenk Xukuumadda JFS**

mhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiiru Dowlaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب وزير الدولة

The Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the State Minister

**WM /XWD-1153/23** **6,September, 2023**

**Ku: Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya**
**Og: Agaasimaha Golaha Wasiirada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha**
**Og: Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Maaliyadda**
**Og: Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Maaliyadda**
**Og: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda**

**Ujeeddo:Habraaca Mamaaulka Guddiga Iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandaraasyada**

Waxaan halkan si xushmad leh idin kugu soo gudbinayaa Habraaca Mamaaulka Guddiga Iskudhafka Wassaaradeed ee Bixinta Qandaraasyada kaas oo looga baahan yahay in ay soo saarto Wasaaradda Maaliyadda, kadibna loo gudbiyo Golaha Wasiirada si loo ansixiyo.

Innago maanka ku hayna nidaamka cusub oo ay tahay in la marsiiyo habraaca ka hor inta aan Wasaaradda Maaliyadda soo saarin waxaan Golaha sharafta leh usoo gudbinaynaa habraacan.

Haddaba, anagoo ka faa'iidaysanayna fursadan, ayaan si xushmad leh idin kugu wargelinaynaa in habraacan uu muhiim u yahay dhaqan-gelinta habaka bixinta Qandaraasyada ee ay soo saaraan Gudiga Wasaaradeed ee Iskudhafka ah si waafaqsan sharicga libka Qaranka.

Sidaa darteed,waxaan Golaha Sharafta leh ka codsanaynaa in la ansixiyo habraacan oo ka mid ah Shuuradaha Mashruuca Deyn Cafinta Dalkeenna.

**Wada shaqeyn Wacan**


**H.E Raho Mohamud Janaqow**
**Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda**
**Ahna K/s Wasiirka Maaliyadda**

# JAMHUURIYADDA FADERALKA AH EE SOOMAALIYA

## WASAARADDA MAALIYADDA

# HABRAACYADA MAAMULKA

## GUDDIGA ISKUDHAFKA WASAARDEED EE BIXINTA QANDARAASYADA



## TUSMO

**EREY BIXIN** ....................................................................................................................4

**1.0 Dabbikhidda Iyo Ujeedooyinka habraaca maamulka Guddiga iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandraasyada.** ....................................................................................................................6

1.1 Dabikhidda Habraacan....................................................................................................................6

1.2 Ujeedoyinka ....................................................................................................................6

**2.0 Maamulka Guddiga iskudhafka Wasaaradeed ee bixinta Qandaraasyada.** ....................................................7

2.1 Doorarka iyo mas'uuliyadaha Guddiga....................................................................................................7

2.2 Qaab-dhismeedka Guddiga ....................................................................................................8

**3. Waaxda Farsamada ee Guddiga** ....................................................................................................8

3.1. Xeer Hoosaadka Gudiga ....................................................................................................9

3.1.2 uyeeridda Kulamada....................................................................................................9

3.1.3 Fadhiyada iyo ka qaybgalaysha....................................................................................................9

3.1.4 Danaha Is-diidan. ....................................................................................................10

3.1.5 Goobta Kulanka ....................................................................................................10

3.1.6 Codaynta....................................................................................................11

3.1.7 Hadal qoraalka kulamada ....................................................................................................11

3.1.8 Go'aannada Qoran....................................................................................................12

**4.0 Oggolaanshaha Mashaariicda Qandaraasyada** ....................................................................................................13

4.1 Qeexidda iyo Xulashada Mashruuca ....................................................................................................13

4.2 Diyaarinta Mashruuca ....................................................................................................15

4.3 Qiimaynta iyo Talo soo jeedinta Waaxda Farsamada ....................................................................................................15

4.4 Dib-u- eegista Guddiga ....................................................................................................17

4.5 Iibka iyo Bixinta Qandaraasyada Mashruuca ....................................................................................................18

4.6 Qiimaynta Tartamayasha....................................................................................................18

4.7 Wada xaajoodka, Talo-soo-jeedinta iyo bixinta Qandaraaska ....................................................................................................20

4.8 Saxiixa Qandaraaska ....................................................................................................22

**5. Fulinta Mashruuca** ....................................................................................................23

5.1 Korjoogtaynta Dhaqan-galka Qanadaraska ....................................................................................................23

5.2 Wax ka Beddelka Heshiisyada Qandaraasyada .......... 23

**6.0 Siyaasadda iyo Hagidda Qandarasyada** .......... 24

Lifaaqa 1aad Qaab-dhismeedka Sharci ee Qandaraasyada .......... 26

1. XEERARKA IYO XEER NIDAAMIYAASIYASHA SOO IIBSIGA/DIB U IIBINTA QANDARAAS EE DAWLADDA .......... 26

2. XEERKA MAAMULKA MAALIYADA DAWLADA (XMMD) .......... 27

Lifaaqa 2aad: Mashaariicda Qandaraasyada .......... 29

Lifaaqa 3aad Oggolaanshaha Qandaraaslaha iyo Marxaladaha Mashariicda. .......... 30

Lifaaqa 4aad: Fikradda Mashruuca Qandaraaska .......... 32

Lifaaqa 5aad: Suurtagalnimada Qanadaraska .......... 33

Lifaaqa 6aad: Dukumentiyada Qandaraaska .......... 33

Lifaaqa 7aad : Wargalinta Waxda Farsmada ee Qandraasyada ee ku saabsan Dukumeentiyada Tartanka Qanadarasyada .......... 35

Lifaaqa 8aad: Warbixinta Qiimaynta Tartanka. .......... 37

**EREY BIXIN**

| **Ereyga** | **Micnaha** |
|---|---|
| **Suurtaglinimada Awoodeed** | Waxa loola jeedaa qiimaynta in mashruucu leeyahay:<br>**(b)** Ballan maaliyadeed oo ku sidkan heshiiska qandaraas oo waaraya, an culays aan macquul ahayn ku soo rogayn hay'adda wax soo iibsanaysa oo laga yaabo inay ka hesho:<br>I. miisaaniyadda loo qoondeeyay ee hay'adda wax soo iibsanaysa si ay ugu shaqeyso hawl maalmeedkeeda<br>II. Misaaniyadda loo qoondeeyey hay'adda wax soo iibsaneysa si waafaqsan qoondaynta miisaaniyadda mustaqbalka.<br><br>**(t)** Kharashaad laga bixiyey xarun ama adeeg hoos yimaada heshiiska qandaraaska in aanu ku soo rogayaan culays maaliyadeed oo aan macquul ahayn ka faai'deytayasha uga denbeeye |
| **Guddiga Qiimaynta Tartamayaasha** | Waa guddi ay u abuurtey GUDDIGA HAY'ADDA QANDARAASYADU, oo u xilsaaran qiimaynta dalabyada iyo diyaarinta warbixinta qiimaynta si ay ugu gudbiyaan "Gudidda Hay'ada Qandaraasyada" ayna u ansixiyaan iyada oo ku saleysan talada ama soo jeedinta waaxda farsamada ee guddiga |
| **Mashruuc Qandaraas** | Qodobka saddexaad ee PPCDA waxa u uku qeexaa, mashruuc lagu bixinayo danta hantida guud oo ay bixiso hay'adda awood u leh, oo siineysa cid aan dawli ahayn muddo cayiman oo hantida lagaga shaqaysiin karo, lagu maamuli karo, lagaga faa'iidaysan karo ama lagu hagaajin karo, taas oo ay fulinayso hay'adda aan dawliga ahayn oo ay ku qabanayso lacag ama tixgelin kale iyadoo la raacayo shuruudaha lagu sheegay heshiiska qanadaraaska. Eeg lifaaqqa 2aad |
| **Waaxda Farsamada ee Qandaraasyada (WFQ)** | Waxa loola jeedaa waaxda farsamada ee la dhisay, iyada oo la raacayo qodobka 121 ee SHIQQ si ay u bixiso awoodda farsamo oo ku saabsan heshiisyada. Ilaa wakhtiga WFQ la dhisayo, waaxda libka ee Wasaaradda Maaliyaddu waa inay fulisaa hawlaha WFQ. |
| **Ballanqaadyada bixinta daymaha iyo daymaha suurtaglka ay tahay in la galo** | Ballanqaadyada bixinta daymuhu, waa deymaha tooska ah ee hoos yimaada heshiisyada qandaraas, taas oo hay'addaha dawladdu ay masuul ka yihiin in ay bixiyaan. Daymaha suurtagalka ay tahay in la galaana waa daymo lacageed taas oo dhicistooda, wakhtigooda iyo qiimahooduba ay ku xidhanyihiin dhicitaanka dhacdo kale oo mustaqbalka ah. Ballanqaadyada bixinta daymaha iyo daymaha suurtaglka ay tahay in la galo, waxa ka mid ah: |

| | |
|---|---|
| | b) Ballanqaadka ay samayso hay'add wax soo iibsanaysaa iyada oo la tixgalinayo adeegyada hoos yimaada heshiiska qandaraas (tusaale, lacagaha muddaysan ay hay'adda dawladdu siiyaan hay'adda gaarka marka qandaraaskii ay qabanaysay hay'adda gaarka ahi dhamaystirmo, tacriifadda)<br><br>t) Magdhawyada laga bixiyo burburka heshiiyada qandaraasyada.<br><br>j) Magdhawga dawladda looga baahan yahay in ay u magdhawdo hay'adda gaar loo leeyahay waxyeelada ama khasaaraha ay sababeen dhacdooyin cayimani.<br><br>x) Hantida dawladda oo laga kireeyo/wareejiyo/xilsaaro hay'add gaar ah inta lagu jiro heshiiska qandaraaska<br><br>kh) Tallaabooyinka ay dawladda ku taageerayso hay'adda gaarka loo leeyahay ee uu dhigayo heshiiska qanadaraasku, sida arrimaha maaliyadeed ee kala ah; cashuur dhaafka, warqadda taageerada, warqadda daynta, dammaanad qaadka, dammaanad qaadka khatarta qayb ahaan ama caymiska khataraha siyaasadeed. |
| **Guddiga Qandaraasyada Iibka Hantida Guud** | Waxaa loola jeedaa Guddiga Qandarasada Iibka Hanti Guud ee lagu dhisay sharciga iibka qandaraasyada qaranka si ay u kormeeraan horumarinta iyo hirgelinta heshiisyada. |
| **Xeer-nidamiyaha soo iibinta** | Xeer-nidaamiyaha soo iibsiga, qandaraasyada, iyo iibinta dawladda ee la soo saaray 2020, ama xeer-nidaamiye kasta oo kan xiga kaas oo burin kara ama wax ka beddeli kara xeer-nidaamiyahan. |
| **Sharciga iibka ee Qaranka** | Sharciga soo iibsiga, qandaraasyada, iyo iibinta dawladda ee la ansixiyay 09, Ogosto, 2016, dibna wax looga beddelay Feebarwari 2020, ama xeer kasta oo kan xiga kaas oo burin kara ama wax ka beddeli kara xeerarkan |
| **Xeerka Maamulka Maaliyada** | Waxa loola jeedaa Xeerka Maamulka Maaliyadda Dawladda ee ku taariikhaysan 25 December 2019 |
| **Mashruucaan La Dalban** | Waxa loola jeedaa soo jeedin qoraal ah oo ka timid cid gaar ah oo ku socota hay'adda wax soo iibsanaysa taas ay ku dalbanayso/doonayso horumarinta mashruuc cusub oo ah mashruuc qandaraas. |
| **Qiimaynta Lacagta** | Waxa loola jeedaa qabashada hawl guud oo ay leedahay hay'ad wax soo iibsanaysa taas oo ay fulinayso hay'add gaar ah oo hoos imanaysa heshiiska qadaraska ah taas oo ka dhalanayso faa'iido saafi ah oo u soo hooyanaysa dawladda iyo bulshada, marka laga eego dhanka; qiimaha, tayada, tirada, waqtiga iyo iska weecinta khatarta |

## 1.0 Dabbikhidda Iyo Ujeedooyinka habraaca maamulka Guddiga iskudhafka Wasaaradeed ee Bixinta Qandraasyada.

### 1.1 Dabikhidda Habraacan.

I. Habracaan waxa lagu dabakhayaa dhammaan mashaariicda[1] qandarasyada ee ay fuliso hay'add kasta oo dawli ah, oo ka tirsan Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya (DFS) oo ay ku jiraan qeexidda mashruuca, qorsheynta, diyaarinta, qandaraasidda, qiimeynta, fulinta iyo kormeerka. Marka ay dhacdo kala duwanaansho u dhexeeya habraacaan iyo xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda ee la ansixiyay Agoosto 9, 2016 dibna wax laga beddelay Febraayo 5, 2020 ("PPCDA") ama xeer nidaamiyaasha ka farcama, waxa la raaci doono xeerka. Soo koobida qaab-dhismeedka sharci ee la xiriira tan, fadlan eeg tixraacca lifaaqa 1aad.

II. xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda iyo habraacan midkoodna laguma dabaqayo arrimaha maalgashiga ganacsiga gaarka loo leeyahay oo aanay jirin waajibaad qandaraas oo dawladeed ama hay'add dawladeed, sida lagu qeexay xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda, abuurista hanti iyo xuquuq kasta. Si looga fogaado shakiga, dammaanad kasta oo dadweyne ama taageero maaliyadeed oo kale oo ka timaadda hay'add dowladeed, hadday tahay mid la hubo ama mid ku xiran xaalad, waxaa loo tixgelinayaa waajibaad qandaraas oo dawladda ah.

III. xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda waxay qeexaysa in hawlaha wax iibsiga iyo bixinta qadaraasyada Maamul Goboleedyada dalku ay hoos imaanayaan shuruucdooda wax iibsiga, sidaas darteedna hawlaha wax-ka-beddelka, ay sameeyaan maamul gobololeedyada laguma maamulayo xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda ama habraacan.

### 1.2 Ujeedoyinka

I. Ujeeda habraacani waa in uu u dejiyo habraacyada iyo shuruudaha ay raacayaan guddiga Wasiirada ee qandaraasyadu si ay ugu gutaan hawshooda si hufan, nidaamsan, wax qabad toolmoon leh, isla xisaabtanna ku dheehan yahay. Waxa uu qeexayaa doorarka iyo mas'uuliyadaha guddiga iyo hay'adaha kale ee muhiimka ah ee ku lug leh geeddi-socodka diyaarinta mashruuca qandaraas, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo doorka kormeer ee guddiga. Waxaa loo nashqadeyey in lagu taageero habka go'aan-qaadashada xog-ogaalnimada ku dhisan ee marxalaha kala duwan ee uu maro mashruucu, sida ay saadaalisay xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda.

[1] Fiiri lifaaqa 2 ee ku saabsan nooca mashaariicda ee loo qaadan karo qandaraas

II. Hirgelinta habraayacdan, waxa kale oo loogu talagalay in lagu taageero mabaadi'da ballaadhan ee aasaaska u ah Xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda ee la ansixiyay, kuwaas oo ah horumarinta dhaqaalaha iyo wax qabadka toolmoon, daahfurnaanta iyo tartanka, daacadnimada iyo isla xisaabtanka. Dib-u-eegis iyo ansixin kasta oo ku saabsan mashruucu, waa in aanay ka leexan mabaadi'daas, waana in ay si guud u taageeraan suurtaglnimada mashruuca iyo awoodda uu u leeyahay mashruucu in uu gaadho Qiimaha Lacagta (VfM).

**2.0 Maamulka Guddiga iskudhafka Wasaaradeed ee bixinta Qandaraasyada.**

**2.1 Doorarka iyo mas'uuliyadaha Guddiga.**

I. waa hay'adda dawladda Soomaaliya u xilsaaran la socoshada soo iibsiga iyo maaraynta heshiisyada, oo ay ka mid tahay dib u eegista iyo bixinta ogolaanshaha, wakhtiyada kala duwan ee geeddi socodka mashruuca

II. waxa ay mas'uul ka tahay in uu ay dib u eegto iyo inay ansixiso qandrasyada, marka la joogo heerarka kala duwan ee mashruuca, ee ah:

- Ka hor inta aan la bilaabin habka wax iibsiga qandaraska: Guddidu waa in ay ansixiysaaa dukumeentiyada tartanka qandaraaska, oo ay ku jiraan qandaraaska qabyo qoraalka ah, iyo sidoo kale qaab kasta oo wax lagu iibsanyo haddii uusan jirin tartan furan .
- Ka hor qiimaynta dalabyada: guddidu waa in ay magacawdaa "guddiga qiimaynta qandaraaska" oo ay dib u eegaan oo ansixiyaan warbixinta qiimaynta taas oo cadaynaysa tartamaha la door biday ama guulaystay
- Ka hor gorgortanka qandaraaslaha la door biday: guddidu waa in ay magacawdaa "kooxda gorgortanka" oo ay ansixiso halbeegyada gorgortanka
- Kahor saxeexa heshiiska qandaraasyada, guddidu waa in ay xaqiijiyaan in la ixtiraamay halbeegyada gorgortanka, qodoba dii heshiiska qandaraaskana sidii looga wada xaajooday aan loo bedelin si aan habboonayn.
- Kahor wax ka beddelka qoddobada qandaraaska, waa in guddidu magacawdaa "kooxda gorgortanka", ansixiyaanna halbeegyada gorgortanka, ka hor inta aan la saxiixin si loo xaqiijiyo in halbeegyada gorgortanka la ixtiraamay iyo in heshiisyada qandaraska, sidii laga xaajooday, aan si aan habboonayn loo beddelin.

iii. Waxa kale oo ay mas'uul ka tahay in ay siiso tilmaamo waaxda farsamadda ee qandaraasyada ("CTU") si loo horumariyo siyaasadaha hirgalinaya diyaarinta iyo fulinta toolmoon ee mashaariicda qandaraas, gaar ahaan in la sameeyo habraacyo iyo diiwaan midaysan.

## 2.2 Qaab-dhismeedka Guddiga

I. Sida ku cad qodobka **116** ee xeerka iibka Qaranka, Guddigu waxay ka koobnaan doontaa toddoba (7) xubnood oo ka kooban saraakiisha xisaabaadka[2] oo ka kala socda:

- Wasaradda Maaliyadda, noqonayana gudoomiyaha guddiga.
- Wasaradda Cadaaladda
- Wasaradda Qorshaynta
- Wasaaradda Arrimaha gudaha
- Garyaqaanka Guud
- Laba sarkaal xisaabeed kale oo ay magacaabayaan golaha Wasiirada oo utaagn danta guud ee qeybaha kala duwan ee dhaqaalaha oo ku xiran bixinta qandaraaska aan ahayn Wasiirka masuulka ka ah qaybtaas.

II. Wasiirka Maaliyaddu waa inuu ka codsadaa Golaha Wasiiradda inay soo magacaabaan liiska joogtada ah ee labo sarkaal ee xisaabaadka kuwaas oo kamid noqonaya xubnaha Guddiga. Wasiirka maaliyaddu waa inuu ku martiqaadaa laba ka mid ah labada sarkaal ee la magacaabay inay ka soo qaybgalaan shir kasta oo guddidu qabanayso, martiqaadkaas oo uu cuskanayo aqoonta ay labadaas xubnood u leeyihiin hawsha hor taalla guddiga, isaga oo dhanka kalena hubinaya in labada xubnood ee uu martiqaaday aysan matalin hay'add wax soo iibsaneysa taas oo ku soo bandhigaysa mashruuc kulankaas guddiga ee maalinkaas.

### 3. Waaxda Farsamada ee Guddiga

I. Waaxdan oo ka mid ah Wasaaradda Maaliyadda, waxaa lagu aasaasay xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda ee la ansixiyay , si ay ugu noqoto guddiga xooghayn, ugana taageerto gudashada shaqadeeda.[3]

II. Waaxda farsamada ee guddiga waa inay fulisaa xilalka iyo masuuliyadaha soo socda:

  - In ay ugu adeegaan guddiga qaab xoghayneed iyaga oo qabanaya hawlaha ay ka midka yihiin: dib u eegista dhamaystirnaanta codsiyada kulanka ee guddiga, ka taageerida gudoomiyaha qabanqaabada iyo fududaynta qabsoomidda kulamada guddiga, diyaarinta qoraaladda iyo diiwaan gelinta go'aamada guddiga, iyo hawlo kasta oo kale oo ay codsadaan guddidu.

---

[2] Marxaladdan hadda lagu jiro horumarinta hay'adaha dowliga ah ee Soomaaliya,Guddigan ayaa guud ahaan ah Wasiirro ee ma ahan mas'uuliyiin xisaabaadka ka shaqeeya, maadaama aan loo arkin kuwa heysta awood ku filan u so saara go'aannada laga rabo Guddigan.

[3] lama dhisin oo waaxda wax iibsiga ee wasaaradda u qaabilsan maaliyadda ayaa hadda fulisa hawlaha Waxda fulinta , Tixraacyada Waaxdan farsmada waxaa loo micneeyay inay ula jeedaan waaxda wax iibsiga ee wasaaradda u xilsaaran maaliyadda, ilaa iyo inta Waxda farsmada si buuxda loo dhisayo oo ay hesho awood ay si ku filan u gudan karto doorkeeda.

- In ay ka taageeraan guddiga hawlaha farsamo, sida: bixinta talooyinka ogolaanshaha ama diidmada mashaariicda ka hor inta aan loo gudbin guddiga si loo ansixiyo, ka caawinta guddiga samaynta habraacyada iyo dukumentiyada midaysan, iyo la-talinta arrimaha kale ee ay ka codsadaan guddidu
- In ay noqdaan cudud farsamo marka ay noqoto arrimaha la xidhiidha qandaraasyada, sida : in ay siiyaan taageero farsamo hay'adaha wax soo iibinsanaya, dhammaan marxaladaha kala duwan ee mashruuca, sida marxaladda hirgelinta mashruuca, iyo guud ahaan kor u qaadista wacyiga iyo fahamka habka qandraasyada ee daneeyayaasha.

III. Shaqaalaynta waaxdan waxaa go'aamin doona Wasiirka Maaliyadda, isagoo la tashanaya guddiga. Shaqaalaha waaxda farsmadu waa in ay tartan u galaan shaqada.

## 3.1. Xeer Hoosaadka Gudiga

### 3.1.2 uyeeridda Kulamada

I. Gudoomiyaha oo kaliya ayaa leh awooda isku yeerista guddiga. Hay'adaha wax soo iibsanaya ama hay'adaha kale ee raba inay codsadaan kulanka guddidu waa inay codsi kulan oo ay ku lifaaqanyihiin dukemintiyada caawinaya codsiga u soo gudbiyaan waxaada farsamada. Waaxdu waa in ay dib u eegis ku sameyso codsiga. Haddi codsigu buuxiyo shuruudaha lagama maarmaanka u ah ujeedada kulanka la soo jeediyay, waa in ay codsiga u soo gudbisaa guddoomiyaha guddiga, si ay uu go'aamiso suurtaglnimada qabsoomida kulanka iyo goorta yeedhmada kulanka guddiga.

II. Marka gudoomiyuhu aqbalo kulanka, waaxda farsamadu waa in ay qabanqaabisaa qabsoomidda kulanka, iyada oo raacaysa wakhtiga iyo goobta uu xeerku tilmaamay, waana in ay la wadaagtaa ajandaha shirka iyo dhammaan dukumeentiyada khuseeya, iyada oo u marinaysa Iimaylka (email) ((rasmiga ah ee xubin kasta, ugu dambayn 14 maalmood ka hor qabsoomidda kulanka. Dhammaan dukumeentiyada lala wadaago xubnaha guddiga waa in si qarsoodi iyo amaano leh loo hayaa.

### 3.1.3 Fadhiyada iyo ka qaybgalaysha.

I. Guddiga waa in aan si sharci ahayn loo dhisin ama shirarkeeda loo qaban iyadoo aanay goob-joog ka ahayn xubnaha matalaaya wasaaradaha u xilsaaran Maaliyadda, Qorshaynta iyo Cadaaladda. Haddii ay maqnaadaan tirade saxda ah ee kooramku, waa in la hakiyaa kulanka, waaxda farsamaduna iyada oo raacaysaa tilmaamaha gudoomiyahu waa in dib ugu dhigtaa wakhtiga ugu horeeya ee macquulka ah.

II. Xubnaha guddidu waxay qoraal ku magacaabi karaan sarkaal kasta oo sare (iyaga oo doorbidaya ku xigeenkooda) si uu wakiil uga noqdo kulanka. Wakiilka la magacaabay ayaa awood buuxda u leh inuu ku matalo hay'addooda kulanka guddiga oo ay ku jirto inay u codeeyaan arrimaha hor yaala guddiga.

III. Wakiil ka socda hay'adda wax soo iibsiga waa in lagu martiqaadaa inuu ka qaybqaato kulanka guddiga, marka ay dani keento, si uu u bandhigo ama u difaaco soo gudbinta mashruuca ama mashruuca guud ahaan. Si kastaba ha ahaatee, wakiilka noocaas ahi xaq uma yeelan doono inuu codeeyo shirka dhexdiisa. Heerka xubin ka mid ah guddidu uu yahay kafiilka mashruuc hor yaala guddiga, xubintaasi xaq uma yeelan doonto inay u codayso arrimaha la xidhiidha mashruuca uu kafiilka ka yahay.

IV. Sarkaalka waaxda farsamada ee mas'uulka ka ah dib u eegista dukumeentiyada qandaraas bixinta waa in lagu martiqaadaa inuu ka hor akhriyo guddiga, dib u eegistii ay ku sameeyeen waaxda farsamadu dukumentiyada mashruuca, si ay guddidu u ansixiso ama u diido.

V. Iyada oo uu go'aaminayo gudoomiyuhu, khuburo kale oo farsamo ama la-taliyeyaal, ayaa lagu martiqaadi karaa inay ka soo qayn galaan kulamada guddiga si ay u bixiyaan falanqayn ku habboon ama taageero farsamo oo la xidhiidha mashaariic gaar ah ama arrimo kale oo hor yaal guddiga.

VI. Marka ay ka qaybgalayaasha aan codaynta lahayni soo bandhigaan macluumaadka looga baahan yahay, waxa uu gudoomiyuhu ku wargelin doonaa in ay ka baxaan kulanka si xubnaha guddidu ay awood ugu yeeshaan inay ka doodaan soo gudbinta mashruuca si qarsoodi ah.

VII. Xubin sare oo ka tirsan waaxda farsamadu waa inuu ka soo qayb galaa dhammaan kulamada guddiga, isaga oo noqonaya xoghaynta guddiga ee kulanka, kuna sugnaan doonaa kulanka guddiga inta lagu jiro kalfadhiyada qarsoodiga ah.

### 3.1.4 Danaha Is-diidan.

I. Xubin kasta oo tirsan guddiga ama qof kasta oo lagu martiqaado inuu ka soo qayb galo kulamada guddiga, kaas oo leh dan toos ah ama dadban, la hubo ama iman karta, dantaas oo hoos imanaysaa waxyaabaha uu koobsanayo qandaraasku waa in uu shaaca uga qaadaa nooca danta uu leeyahay guddiga, ka hor inta aan laga gelin dooda ku saabsan arrintaas, ama isla marka uu ku baraarugo dantaas, caddayntaas uu cadeeyay dantana waa in lagu diiwaangeliyaa nuxurada.

II. Marka ay dhacdo iska hor imaad daneed ,qofka ama xubinta danaha iska soo hor imanaya lihi, waa in aanu ka qayb qaadan doodaha ama go'aanka guddiga ee la xidhiidha arrintaas.

**III.** Ku guuldarraysiga in la shaaciyo iska hor imaadka danahu waxa uu noqon doonaa anshax baal marsanaan sida uu qabo qodobka 119 ee Xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda ee la ansixiyay.

### 3.1.5 Goobta Kulanka

I. Kulamada guddiga waa in lagu qabtaa gudaha Wasaaradda Maaliyadda. Xaaladaha aan caadiga ahayn, isla markaasna lagama maarmaanka tahay

in ay guddigu gudato mas'uuliyadeeda, guddoomiyuhu wuxuu go'aamin karaa in shirarka guddigu lagu qabto meel kasta oo Soomaaliya ka mid ah, ama habka is aragga/maqalka fog

II. Haddii kulanka lagu qabto habka is aragga/maqalka fog, xubnaha guddidu waxa ay kaga qayb qaadan karaan hab muuqaal ah ama hab kasta oo kale oo xidhiidh isgaadhsiineed ah, taas oo ay ka dhalanayso in qof kasta oo ka qayb qaadanaya kulanku uu awoodo inuu maqlo xubnaha kale ee ka qayb qaadanaya kulanka, waana in xubin kastaa cadeeyaa in uu u joogo xaqiijinta ujeedada kulanka. haddi ay dhacdo in xubin ka mid ah ku guuldaraysto cadayntaas, xubintaasi xaq uma laha hadalka iyo codaynta kulanka. Ka-qaybgalka kulanka, iyadoo loo marayo habkan oo kale waxay ka dhigan tahay ka qaybgal rasmi ah. kooramka iyo shuruudaha kale ee lagu dabaqo kulamada fool ka foolka ah ee guddiga isma beddelayaan waxaana loogu dhaqmayaa sidoodii marka la joogo habka aragga/maqalka fog. Ka soo qayb galka kulanka waa in lagu xadidaa xubnaha guddiga iyo ka qaybgalayaasha kale sida kor lagu sharraxay. Marka kulamada loo qabto habkan, ka qaybgale kasta waxa mas'uul ka yahay ilaalinta sirta kulanka. Ka qeybgalayaashu waa inay kulanka ka soo galaan meel gaar ah ama qol xidhan, iyaga oo ka taxadiraya xog helista cidda aanay khusaynin.

### 3.1.6 Codaynta.

Kulan kasta, xubin kastaa waxa ay leedahay hal cod. Qaadashada go'aan kasta oo guddidu qaadanayso, waxa ay u baahan doontaa codka kalsoonida oo ah hal dheeri, marka xubnaha kulanka fadhiyaa buuxiyaan kooramka kalfadhiga, taas oo la macno ah codaynta ugu yaraan 51%( boqolkiiba konton iyo kaw) xubnaha kulanka fadhiya, iyada oo markasta la tixgelinayo buuxitaanka kooramka.

Si kastaba ha ahaatee, marka go'aanka gudida uu taabanayo qiimaynta waxa la awoodi karo iyo isticmaalka FCCL, guddidu ma ogolaan karto mashruuc ilaa Wasaaradda Maaliyaddu ay caddayso in mashruuca wax la iska waydiiyay uu taagan yahay heerka la awoodi karo, buuxiyayna shuruudaha Gudida. Dhammaan go'aamada guddiga, ha ahaato go'aan qoraal ah ama mid kulan guddi ahe, waa in lagu diiwaangeliyaa hab qoraal ah, una ilaalisaa si habboon, oo nidaamleh waaxda farsamadu, iyada oo gudanaysa waajibkeeda ahaanshaha xoghaynta guddiga.

### 3.1.7 Hadal qoraalka kulamada

I. Waaxda farsamaddu waa in ay diyaarisaa nuxuradda kulan kasta oo guddidu yeelatay, lana wadaagtaa xubin kasta iyada oo loo marinayo ciwaankooda rasmiga ah ee iimaylka 7 maalmood gudahood, taas oo ka bilaabmaysa maalinta kulanku dhacay. Ka qaybgalayaasha aan xubin ka ahayn guddiga waa inay helaan qaybaha ka khuseeya nuxurka. Ka qaybgalayaasha waxaa la siin doonaa 7 maalmood si ay dib ugu eegaan

nuxuradda una soo gudbiyaan wixii saluug ah ee ku saabsan nuxurka. Haddii diidmo timaado, waaxda farsamadu waxa ay dib ula soo wadaagi doontaa ka qayb galayaasha nuxuradda dib loo eegay 7 maalmood gudahood. Haddii aysan jirin diidmo kale, waaxdu waa in ay u gudbisaa nuxurka shirguddoonka, kaas oo saxiixi doona 7 maalmood gudahood. Nuxuradda waa in ay ku cadyihiin falanqayntii guddiga farsamadu ku samaysay mashruuca ama arrimaha la xidhiidha, sida qiimaynta farsamo ee la xidhiidha iyo go'aamada laga qaatay.

II. Haddii xubin ka mid ah guddiga ay keento ogaysiis qoraal ah, taas oo ay ku codsanayso in diidmadeeda lagu muujiyo nuxurka kulan kasta, taas oo la xidhiidha arrimo laga dooday inta xubintaasi goob jooga ahayd. Diidmadaas waa in si sax ah loogu muujiyaa nuxurka, dibna loola wadaaga xubnaha qoraalka qabyada ah, iyadoo oo ay diidamaadaasi ku caddahay, ka hor inta aanay guddidu ansixin qoraallada qabyada ah.

III. Ka dib ansixinta qoraallada, waaxda farsamaddu waa in ay diyaariyaan qoraal kooban oo lagu daabacayo mareegta Wasaaradda Maaliyadda. Qoraalka kooban waa in ay ku jirtaa warbixin guud-mar ah oo ku saabsan qodobbadii muhiimka ahaa ee doodda iyo liiska dhammaan oggolaanshiiyaha mashruuca la xidhiidha.

### 3.1.8 Go'aannada Qoran

I. Marka go'aamada guddiga aan laga fileyn inay u baahan yihiin soo bandhigida mashruuca oo faahfaahsan ama xog kala soo dhex bixidda doodaha laga yeesho mashruuca, waxa caadi ah iyada oo la raacayo go'aanka gudoomiyaha, in lagu dhameeyo go'aan qoraal ah iyada oo aan la iskugu iman kulan. Si looga fogaado shakiga, go'aannada qoran looma adeegsan karo, ansixinta dukumeentiyada tartanka qandaraaska, ansixinta warbixinta qiimaynta, soo saarista halbeegyada gorgortanka ama ansixinta qandaraasyada hisiiska ka hor inta aan la saxiixin.

II. Marka habraaca qoran la isticmaalayo, guddiga farsamaddu waa in ay la wadaagtaa dukumentiga la xidhiidha mashruuca dhamaan xubnaha, iyada oo u marayinaysa iimaylka rasmiga ah ee xubin kasta, dukemintidayaas waxa ka mid ah go'aanka qoraalka oo qabyo ah, kaas oo xubnaha laga codsanayo in ay u codeeyaan. Iimaylku waa inuu tilmaamaa wakhti go'an, oo aan ka yarayn 5 maalmo shaqeed, taas oo lagu soo gudbinayo faallooyinka ama diidmada ku saabsan dukumentiyada. Ka dib markii la helo faallooyin ama diidmo, go'aanka kama dambaysta ah ee qoran ayaa markaa lala wadaagi doonaa dhammaan xubnaha, iyada oo laga codsanayo in ay codeeyaan, kuna astaysan waqti cayiman oo aan ka yarayn 3 maalmo shaqeed. Xubnaha waxaa looga baahan yahay inay ku soo jawaabaan iimayl si ay u muujiyaan codkooda. Nidaamyada kor ku xusan ee khuseeya iska hor imaadka danaha, kooramka iyo codeynta waa in lagu dabaqaa habraacan.

Waaxdu waa inay diyaarisaa nuxurka kulanka ee go'aanka qoran, kaas oo koobsanaya faallooyinkii ama diidmooyinkii, iyo sidoo kale natiijada codbixinta. Fariintii iimaylka ee dhammaan xubnaha codeeyay waa in lagu lifaaqaa qoraalka kooban. Ka dib ansixinta qoraallada, waaxda farsamaddu waa in ay diyaariyaan qoraal kooban oo lagu daabacayo mareegta Wasaaradda Maaliyadda. Qoraalka kooban waa in ay ku jirtaa warbixin guud-mar ah oo ku saabsan qodobbadii muhiimka ahaa ee doodda iyo liiska dhammaan oggolaanshiiyaha mashruuca la xidhiidha.

## 4.0 Oggolaanshaha Mashaariicda Qandaraasyada

xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda waxa uu hiigsanayaa korjoogtaynta guddiga ee mashaariicda qanadarasyada oo noqonaya bixinta ogolaanshiiyo taxane oo loo baahanyahay marxaladaha is xiga ee mashruuca. Heerarkan ayaa guud ahaan ah 4 marxaladood:

i. qeexidda iyo xulashada mashruuca;
ii. diyaarinta mashruuca;
iii. soo iibsiga iyo qandaraasyada mashruuca; iyo
iv. hirgelinta mashruuca.

Oggolaanshaha looga baahan yahay marxalad kasta waxa lagu qeexay qoraaladda hoose, iyada oo ay weheliso warbixin faahfaahsan oo ku saabsan doorarka hay'adaha kale ee saamaynta ku leh/khuseeya xil gudashada guddiga.

## 4.1 Qeexidda iyo Xulashada Mashruuca

I. Marka loo eego xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda, qeexidda mashruucu caadi ahaan waa mas'uuliyadda hay'adaha wax soo iibinaysa, taas oo ay tahay in ay go'aamiyaan haddii ay jiraan mashruucyo lagama maarmaan u ah gaadhitaanka ujeeddooyinkooda horumarineed, taas oo sida ugu wanaagsan ee lagu bixin karaa tahay qaab wada xaajood ah. Mashaariicda waxa sidoo kale qeexi kara hay'adda gaarka loo leeyahay, iyaga oo u soo gubinaya mashruuc aan la dalban hay'adda wax soo iibsanaysa. Hay'adda wax soo iibsanaysa ayaa weli mas'uul ka ah go'aaminta, tusaale ahaan, in la tixgeliyo mashruuc aan la dalban. Dhammaan mashaariicda lagu bilaabay mashruuc aan la dalban waa inay wali helaan ogolaanshaha guddiga ee loogu baahan yahay marxaladaha kala duwan ee

mashruuca.[4]

II. Wasaaradda Maaliyaddu, iyada oo u maraysa waaxda farsamada, waxay sidoo kale qeexi kartaa mashaariicda suurta galka ah ee ku qotoma xilliyada ama qayb ka mid ah horumarinta qorshaha qandaraasyada sannadlaha ah si kor loogu qaado adeegsiga heshiisyada ama kaabista qoondaynta maalgalineed ee hay'adaha wax soo iibinsanayaa si loo diyaariyo mashruuc. Qeexidda noocan ahi waxa uu ku salaysnaan kartaa agabka falanqaynta xogaha (analytical tools) ama hab kasta oo ay go'aamiso Wasaaradda Maaliyaddu.

III. Ka hor inta aan la gudo gelin hawlaha diyaarinta mashruuc kasta oo qandaraas ah, ha ahaado mid ay soo qeexday hay'adda wax soo iibsanaysa, Wasaaradda Maaliyadda ama hay'add gaar loo leeyahay, waa in hay'adda wax soo iibsanaysaa qaadato shahaado qandaraas ah oo ay bixinayso Wasaaradda Maaliyaddu. Codsi kasta oo shahaado qanadaraas ah waa in loo gudbiyaa guddiga farsamada. Waa in ay la socotaa qoraal koobaya fikradda guud ee mashruuca[5] kaas oo bixinaya xog ku filan si loo qiimeeyo mashruuca iyada oo la raacayo shuruudaha hoose.

IV. Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu, isaga oo ka duulaya talada Agaasimaha Guud ee wasaaradda iyo waaxda farsamada, lana tashanaya hay'adaha kale ee ay khusayso, waxa uu bixinayaa shahaado qanadraas, marka shuruudaha soo socda la buuxiyo.

- Qandaraas hoos imanaya dhinaca dhaqaalaha kaas oo qabanqaabada qadaraska lagu fulin karo si loo horumariyo ujeedooyinka dhaqaale ee qaranka;
- Mashruuca la soo jeediyay oo aan hore loogu qoondayn hantida dadweynaha; iyo
- Caqabad kasta ama caqabado u baahan in wax laga qabto ka hor ama inta lagu jiro diyaarinta mashruuca, soo iibinta iyo qandaraasyada si cad ayaa loo aqoonsaday

V. Marka la codsado shahaadada qandaraska ee ku saabsan USP, Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu waa inuu u gudbiyaa mashruuca guddiga si loo ansixiyo ka hor inta aan la bixin shahaado qandaraas. Guddidu waa in ay xaqiijisaa waxyaabaha soo socda ka hor inta aanay bixin ogolaanshiiyaha.

- In aanay jirin USP-yo hore ama heshiis kan la mid ah oo loo gudbiyay cidda wax soo iibsanaysa ama wakaalad kale ama Soomaaliya guud ahaan;

---

[4] Xaaladaha qaarkood guddiga waxaa laga yaabaa inay leedahay mas'uuliyado dheeraad ah oo ku saabsan USP, kuwa ugu muhiimsan kuwan ayaa lagu xusay habraacyadan oo dhan. Xeerarka wax iibsiga waxay bixiyaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hababka USP.

[5] Nuxurka ugu yar ee loo baahan yahay ee qoraalka fikradda ayaa ku taxan Lifaaqa 4 ee habraacankan.

- Kaabaha la hirgelinayo ama adeegga guud ee lagu bixiyo si waafaqsan USP waa in uu yahay fikrad gaar ah ama hal-abuur leh oo aan guud ahaan laga helin ilo kale oo la yaqaan;
- Natiijooyinka la soo jeediyay in la gaadhayo, waa in ay si wayn waxtar ugu leedahay, ama u leedahay faa'iido qiimeed dawladda Soomaaliya iyada oo aan wax kharash toos ah ama dadbani midna ka bixin miisaaniyadda dawladda;
- In aanay jirin tabarucaad dhaqaale ama taageero kale oo ay bixinayso dawladdu;
- Iyo in aan soo jeedintaas, aan hore loogu qoondayn qorshaha wax-ka-dhigidda sannadlaha ah, aanu jirinna qorshe wax-iibsi oo u yaalla soo jeedintaas.

### 4.2 Diyaarinta Mashruuca

I. Hay'adda wax soo iibsanaysa ayaa mas'uul ka ah diyaarinta mashruuca, oo ay ku jiraan diyaarinta daraasadda suurtaglinimada qandaraaska[6] ah, qabashada kulamada la-tashiga daneeyayaasha, iyo diyaarinta dukumentiyada qandaraaska oo ay ka mid yahay heshiiska qaybyo qoraalka ahi[7]. Waaxda farsamadu waxay diyaar u tahay inay siiso taageero farsamo hay'adda wax soo iibsanaysa inta lagu jiro marxaladda diyaarinta mashruuca.

II. Marka la dhamaystiro, hay'adda wax soo iibsanaysaa waa inay u gudbisaa dhammaan dukumeentiyada khuseeya qandaraaska waaxda farsamada si ay u qiimayso. Marka waaxdu ay dhamaystirto dib u eegista farsamo ee dukumeentiga, waxay u gudbin doontaa dukumeentiga guddiga si ay dib u eegis ugu sameyso, iyadoo la guda gali doono ogolaanshaha ama diidmada dukementiga.

### 4.3 Qiimaynta iyo Talo soo jeedinta Waaxda Farsamada

I. Waaxdu waa in ay dib u eegis bilow ah ku sameyso dukumeentiyada mashruuca ay soo gudbisay hay'adda wax soo iibsaneysa 7 maalmood gudahood. Haddii wax dukumeenti ahi maqan yihiin ama aanu si ku filan u dhammaystirnayn si ay awood ugu siiso waaxda farsamaddu in ay qiimeeyaan shuruudaha lagu faahfaahiyey qodobkan (ii) oo ay dhammaystiraan qoraalkooda kooban sida loogu baahan yahay qodobka(iii), waaxda farsamaddu waa in ay la xidhiidhaa cidda wax soo iibsanaysa oo ay tilmaamto halka ay cilladuhu ka jiraan. Goorta dhamaan agabku diyaarka yihiin, marka uu ansixiyo Wasiirka Maaliyaddu, waaxda farsamadda waxa laga yaabaa inay bixiso taageero ay siiso hay'adda wax soo iibsanaysa si ay u dhamaystirto hawlaha muhiimka ah ee diyaarinta Mashruuca ama haddii kale waxay siin kartaa hagitaan hay'adda wax soo iibsiga si ay u taageerto diyaarinta dukumentiyada mashruuca.

[6] Nuxurka warbixinta daraasadda suurtagalka ah waxay ku taxan tahay Lifaaqa 5 Habraacyadan
[7] Qaybta dukumeentiyada qandaraaska waxay ku taxan yihiin lifaaqa 6 ee Habraacyada

II. Marka dukumentiyada mashruuca, oo ay ku jiraan daraasadda suurtagalnimada mashruuca iyo dukumeentiyada qandaraas bixinta, ay si dhab ah u dhammaystirmaan, waaxda farsamaddu waa inay dib u eegis farsamo ku sameyso mashruuca. Inta ay socoto dib u eegista guddidu, waxa ay guddidu codsan kartaa taageero khaas ah ama waxa ay la tashi la yeelan kartaa daneeyayaasha kale markay u aragto lagama maarmaan. Guddidu waxa ay dib u eegista diiradda ku saari doontaa in mashruucu buuxiyay shuruudaha muhiimka ah ee soo socda:

- Mashruucu farsamo ahaan in uu yahay mid suurtagal ah, kaas oo shuruudaha farsamo yihiin qaar si wacan u qeexan, si qoto dheerna loo fahmi karo.
- Mashruucu waa in dhaqaale ahaan suuragal yahay (i) ku tiirsanayn miisaaniyada dawladda ama taageero ka helayn, ama (ii) Miisaaniyad kasta oo dawladeed ama taageero kale oo la soo jeediyo oo buuxisa shuruudaha la awoodi karo ama xayiraadaha kale ee FCCL sida uu soo rogi karo Wasiirka ka mas'uulka ah xagga Maaliyadda. Waaxda farsamadu waxay ka codsanaysaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda inuu qiimayn ku sameeyo arrimahan, isaga oo la kaashanaysa Waaxda Maamulka Daymaha iyo Waaxda Misaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda, waxayna qiimayntan kaga warbixin doontaa qoraalkeeda kooban.
- Sharci ahaan in bixinta mashruuca lagu bixinayo hab qandaraas ahi tahay mid sax ah, heshiiska qandaraaskuna yahay mid waafaqsan sharciga, xeerarka iyo qaababka la ansixiyay ee dalka, uuna si habboon u daboolayaa qodobbada ku qeexan lifaaqa 5aad.

- Mashruucu waa in uu ku haboon yahay in lagu bixiyo hab qanadaraas ah, sida lagu caddeeyey iyada oo loo marayo qoondayn cad oo habboon oo khataraha u dhexeeya cidda wax soo iibsanaysa iyo ha'ayadda gaarka loo leeyahay, qiimaynta lacageed ee lagu sameeyayna, si waafaqsan shuruudaha guddiga
- Dukumeentiyada qandaraasyadu waa in ay yihiin kuwo waafaqsan qodobka 143, 151 iyo 152, ee xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda, sidoo kalena taageerayaan hab doorashada tartan iyo daahfurnaani sal u tahay. Isticmaal kasta oo hab wax iibsi ah oo aan loo marin tartan furan, waa in la sababeeyaa si waafaqsan Qodobka 138 ama 139 ee xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda.

III. Waaxda farsamaddu waa in ay u diyaarisaa guddiga qoraal xog warran ah, kaas oo lagu faahfaahinayo natiijooyinkii iyo talooyinkii ka soo baxay dib u eegistii ay ku sameeyeen dukumeentiyada qandaraaska iyo warbixinta daraasaddayntii lagu sameeyay suurtagalnimada mashruuca, 45 maalmood

gudahood oo ka bilaabmaysa taariikhda la soo gudbiyay dukumeentiga dhamaystiran. Mararka ay dhacdo in ay la kulmaan mashaariic aad u adag, waaxda farsamaddu wax ay ka codsan kartaa guddoomiyaa muddo dheeraad ah oo loogu kordhinayo muddadii dib u eegista. Qoraalka kooban waxa uu qeexi doonaa macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan qandaraska, si guddiga looga caawiyo falanqaynta qandaraaska. Mashruuca aan soo gudbin macluumaad ku filan si waaxda farsamadu awood ugu hesho in ay qiimayso, sidii lagu cadeeyay qoraalka hagaha ah ee ku jira lifaaqa 7 ee habraacan, looma gudbin doono guddiga si ay dib ugu eegto.

IV. Ka dib marka la dhammeeyo warbixinta xog warranka ah iyo ansixinta guddoomiyaha, waaxda farsamaddu waa in ay u gudbisaa dukumeentiyada mashruuca iyo warbaxinta xog warranka ah guddiga.

### 4.4 Dib-u- eegista Guddiga

I. Marka ay hesho dukumeentiyada mashruuca iyo qoraalka xog warranka ah, guddidu waxa ay haysataa 30 maalmood si ay u ogolaato ama u diido dukumeentiyada tartanka qandaraaska, oo ay ku jiraan habka soo iibsiga ee la soo jeediyay.

Iyada oo raacaysa tilmaanta gudoomiyaha, waaxda farsamadu waa in ay iskugu yeedhaa kulan guddiga, si loo go'aamiyo in dukumeentiyada qandaraaska la ansixiyo ama diido. Kulanka guddiga waa in lagu soo martiqaadaa hay'adda wax soo iibsanaysa iyo waaxda farsamadda si ay ugu soo bandhigaan guddiga mashruuca, ugana jawaabaan su'aalaha ku saabsan.

II. Guddidu inta aanay gaadhin go'aan, waa in ay tixgelisaa arrimaha soo socda:
   - Talooyinka waaxda farsamadda;
   - Qaabdhismeedka guud ee horumarinta qaranta iyo siyaasadaha kale ee la xidhiidha, sida bixinta adeeg dadweyne oo hufan; iyo,
   - In mashruucu buuxiyay shuruudaha muhiimka ah ee lagu sheegay qodobadda ku xusan (4.2.1). Guddidu waxa ay ogolaan kartaa oo kaliya mashruucyada uu qiimeeyay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda , ee buuxiyay shuruudaha marka la eego dhanka awoodista mashruuca iyo isticmaalka FCCL.

III. Marka guddidu ay ogolaato ama diido dukumeentiyada tartanka qandaraaska, guddidu, iyada oo soo marinaysa waaxda farsamada, waa in ay soo saartaa ogeysiis qoraal ah oo ku socodsiinayso hay'ada wax soo iibsaneysa. Haddii go'aanku ka duwan yahay taladii waaxda farsamada, guddidu waa inay qeexdaa sababaha kala duwanaanshaha. Haddii ogeysiisku muujinayo in mashruuca la diiday, sidoo kale waa in lagu daro sababaha diidmada kuwaas oo ay tahay in wax laga qabto haddii mashruuca la doonayo in la oggolaado. Hay'adda wax soo iibsanaysaa waxa ay dib ugu soo celin kartaa daraasadda suurtaglnimada mashruuca ah iyo dukumeentiyada tartanka qadanraaska waaxda farsamada, muddo lix bilood ah oo ka bilaabmaysa marka ay heshay ogeysiiska diidmada ah.

IV. Haddii dukumeentiyada qandaraas bixinta ee dib loo eegay iyo daraasadda suurtagalnimada mashruuca, aan dib loogu soo gudbin lix bilood gudahood marka la helo ogeysiiska diidmada ee guddiga ka dib, ama, haddii iyada oo la

raacayo ra'yiga waaxda farsamadda, mashruuca la hakiyay si wayn dib loogu qaabeeyay ama duruufaha mashruucu isbeddeleen, hay'ada wax soo iibsanaysa waa in ay dib u soo gudbisaa qoraal koobsanaya fikradda guud ee mashruuca, siay u haleen shahaado cusub oo qandaraas.

### 4.5 Iibka iyo Bixinta Qandaraasyada Mashruuca

I. Marka la helo oggolaanshaha guddiga ee dukumeentiyada tartanka qandaraaska, hay'adda wax soo iibsaneysa waxay sii wadi kartaa nidaamka soo iibsiga mashruuca sida ku qeexan dukumeentiyada tartanka qandaraaska. Waaxda farsamaddu waxa ay ahaan doontaa mid ay heli karto hay'adda wax soo iibsanaysa si ay uga taageerto hadba wixii looga baahdo inta lagu gudo jiro habkan. Hay'adda wax soo iibsanaysa waa in ay ogaysiisaa waaxda taariikhda ugu horaysa ee ay soo gudbiyaan tartamayaashu, hadday tahay muujinta dananaynta qaadashada qandaraaska, aqoonsiyada ama codsiyada, ugu yaraan 30 maalmood ka hor wakhtiga kama dambaysta ah.

### 4.6 Qiimaynta Tartamayasha

I. Kahor inta aanay gudbin tartamayaasha, guddidu waa in ay samaysaa "Guddiga Qiimaynta Qandaraaska" ("GQQ") kaas oo furi doona dibna u eegi doona soo gudbinta tartamayaasha sida ku qeexan dukumentiga qandaraaska iyo xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda. CQQ waxaa guddoomin doona wakiil ka socda hay'adda wax soo iibsaneysa, waana in ay ka kooban tahay ugu yaraan 3 xubnood, kuwaas oo mid ka mid ahi yahay wakiil ka socda waaxda farsamada. Xubnaha kale ee guddiga waxaa ku jiri kara wakiillo dheeraad ah oo ka socda hay'adda wax soo iibsaneysa, iyo sidoo kale wakiillada daneeyayaasha kale ee dowladda. Guddiga waxa ay hagitaan la wadaagi kartaa CQQ, si ay uga taageerto gudashada hawshooda.

II. GQQ waa in ay ku diyaariyaan warbixinta qiimaynta lixdan maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa marka la furo soo jeedinta. Mararka ay CQQ la kulanto mashaariic adag, GQQ waxa ay weydiisan karta gudoomiyaha muddo dheeraad ah oo ay ku sii waddo dib u eegisteeda. Warbixinta guud ee qiimayntu[8] waxay dabooli doontaa qiimaynihii lagu sameeyay dhammaan heerarka kala duwan ee xulashada, oo ay ku jirto qiimaynta hordhaca ahi, haddii loo baahdo. CQQ waxa ay ka soo talo bixinaysaa tartamaha la doortay/guulaystay iyo tartamayaasha ku soo xigay, iyada oo soo raacinaysaa bundooyinka tireed iyo falanqaynta tayeed ee ku salaysan shuruudahii lagu cadeeyay dukumentiyadii tartanka. Sidoo kale waa in ay si cad ugu xustaa shuruudaha ku qeexan codsiyada tartamayaasha saddexda ah ee ugu dhibcaha sareeya, kuwaas oo u ay ka dhalanayso gorgortan, sidoo kale waa in ay CQQ xusaan nooca, qaabka iyo wakhtiga wada xaajoodka lala galayo qandaraaslaha la doortay.

III. Marka warbixinta qiimaynta la dhammeeyo, GQQ waa inay u soo gudbisaa warbixintan waaxda farsamadda si ay dib ugu eegto ka hor inta aan loo gudbin

[8] Warbixinta qiimayntu waa inay lahaataa nuxurka sida ku qoran Lifaaqa 8 ee SOP-gan.

guddiga. Waxaa arrinkaas barbar socda, u kuur-gelid xeeldheeer oo hay'adda wax soo iibsaneysa ku samaynayso tartamayaasha ugu dhibcaha sareeya si waafaqsan qodobka 154 ee xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda. Hubintan xeesha dheer ee ay hay'addu samaynayso, waa in lagu dhammeeyaa 10 maalmood gudahood oo ka bilaabmaysa maalinta warbixinta loo gudbiyay guddiga farsamada. Hay'adda wax soo iibsanaysa waa in ay waaxda farsamadda u soo gudbisaa natiijooyinka ku saabsan awoodda sharci iyo xaqiiqada tartamayaasha, isla marka ay dhamayso u kuur gelisdeeda. Ku guul daraysiga in lagu soo qudbiyo wakhtiga loo cayimay, waxa uu dib u dhigayaa in loo gudbiyo warbixinta guddiga.

IV. 14 maalmood gudahood, oo ka bilaabmaysa marka la helo warbixinta qiimaynta, waaxda farsamadu waa in ay dib u eegis ku samayso warbixinta qiimaynta, una soo jeedisaa talo qoraal ah guddiga, si ay u ogolaato ama u diido xulashada guulaystaha ku xusan warbixinta qiimaynta. Waaxda farsamadu waxay ku salaynaysaa taladeeda sidan:
- Qandaraaslaha ugu dhibcaha sarreeya waxa loo aqoonsanayaa guuleystaha;
- GQQ in ay si habboon oo sax ah u isticmaashay habka qiimaynta iyo shuruudaha sida ku qeexan dukumeentiyada tartanka qandaraaska; iyo
- Qiimaynta iyo hab-dhaqanka guud ee habka wax soo iibsiga u ahaa mid waafaqsan xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda.

V. Waaxda farsamada waa in ay sidoo kale dib u eegis ku sameysaa qaabka iyo nooca gorgortan ee la soo jeediyay kuna cad warbixinta qiimeynta tartanka, kuna wargeliso guddiga in qaabka/nooca gorgortan ee la soo jeediyay uu waafaqsan yahay shuruudaha dukumeentiyada qandaraaska iyo xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda, wiiqaynina hufnaanta qaabka tartanka. Si ay u hubiso in nooca/qaabka gorgortunku uu wiiqayo hufnaanta qaabka tartanka, waa in waaxda farsamadu eegtaa in nooca/qaabka gorgortanku uu horseedayo qoddobadan:
- Wax ka beddelka agabka qaybinta khatarta ah ee dhinacyada lagu sheegay heshiiska wax-ka-dhigidda;
- wax ka beddel lagu samaynayo qorshaha maaliyadeed ee uu soo gudbiyay tartamuhu;
- Wax ka beddel lagu samaynayo shuruudaha qandaraaska lagu bixiyay;
- wax ka beddel lagu samaynayo qaabdhismeedka maaliyadeed/ganacsi ee mashruuca; ama
- Dib u habayn lagu sameeyo shuruudaha iyo tilmaamaha lagu qeexay dukumeentiyada tartanka in aan laga gorgortami karin.

VI. Waaxda farsamaddu waa in ay u gudbisaa taladeeda oo ay la socoto warbixinta qiimayntu guddiga si ay u faaqiddo.

VII. Ka dib marka lala wadaago dukumeentiyada loo baahan yahay guddiga, iyada oo la raacayo soo-jeedinta guddoomiyaha, waaxda farsamadu waa in ay iskugu yeedhaa kualn guddiga si ay u suurtageliso go'aan gaadhista guddiga14 maalmood gudahood. Guddidu waxa ay yeeli kartaa arrimahan hoos ku xusan:

- In ay ansixiso warbixinta qiimaynta, dhigto halbeegyada gorgortanka, oo ay ka mid yihiin arrimaha la tixgaliyanayo marka lagu gudo jiro gorgortanka iyo wakhtiga gorgortanka, magacawdana guddiga gorgortanka;
- In ay diido warbixinta qiimaynta, samaysana saddexdan midkood. 1. In ay ka codsato GQQ dib u qiimayn 2. In ay ku taliso in dib loo baahiyo qandaraaska 3. In ay ku taliso joojinta guud ahaan mashruuca;
- In ay codsato faahfaahin ku saabsan sida GQQ ku gaadhay go'aamada qaar, haddii loo baahdo; ama
- In ay codsato wax ka beddel kooban oo ku eeg meelaha ay ku jiraan khaladaadka la arki karo, sida qaab-qoraalka ama xisaabaadka haddii deegaan ahaan ay lagama maarmaan tahay.

VIII. Guddidu, iyada oo sii marinaysa waaxda farsamada waa in ay soo saartaa ogaysiis qoraal ah oo ay ku caddaysay go'aankeeda, kaas oo ay ku socodsiinayso hay'adda wax soo iibsaynaysa. Haddii ogeysiisku sheegayo in warbixinta qiimaynta la diiday, waa in lagu daraa sababaha diidmada. Haddii ay suurtogal tahay in GQQ ay saxdo warbixinta qiimaynta, waa in dib ugu soo gudbisaa guddiga iyada oo soo marinaysa waaxda farsamada si loo ansixiyo ama loo diido. Haddii ogeysiisku muujinayo in warbixinta qiimaynta la ansixiyey, waa in uu sidoo kale:

- Lagu qeexaa halbeegyada gorgortanka , oo ay ka mid yihiin arrimaha la tixgelin doono marka lagu guda jiro habka gorgortanka iyo wakhtiga gorgortanka; iyo
- In lagu caddeeyo guddiga gorgortanka, kuwaas oo si la mid ah GQQ, uu guddoomin doona xubin ka tirsan hay'adda wax soo iibsaneysa, kana kooban ugu yaraan 3 xubnood, oo mid ka mid ahi yahay wakiil ka socda waaxda farsamadu.

**4.7 Wada xaajoodka, Talo-soo-jeedinta iyo bixinta Qandaraaska**

I. Guddiga Wada xaajoodku waa inay bilaabaan wada hadallada sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah ka dib ogeysiinta guddiga qandaraasyada. Haddi ay laga maarmaan noqoto Guddiga Wada xaajoodka waxa taageeraya la-taliyayaal dibadeed . Haddii aan si kale loogu sheegin halbeegyada Wada xaajoodka, Guddiga Wada xaajoodku waa inay soo gudbiyaan warbixinta koboca/horusocodka bil kasta iyagoo xusaya qodobbada lagu heshiiyey iyo arrimaha weli taagan ee aan la xallin.

II. Wada hadalka waxa marka hore lala yeelan doona tartamaha ugu sarreeya tartamayaasha ee lagu xusay warbixinta qiimaynta ee ay ansixisay guddiga qandaraasyadu. Haddii ay dhacdo in Guddigaa Wada xaajoodku ay ka guul gaadhi waayaan wada hadalkaas ay la yeesheen tartama lasoo xulay, iyagoo raacaya macaayiirta/ Halbeegyada wada xaajoodka, waxay codsanayaan oggolaanshaha guddiga qandaraasyada, iyagoo ogaysiin qoraal ah ku socodsiinaya Waaxda farsmada, si:

- Loo bilaabo wada hadalka tartamaha kusoo xiga darajo ahaan tartamihii hore, illaa iyo wada xaajoodku kasoo af go'ayo, gabagaboobayo; iyo/ama

- Loo hagaajiyo ama wax ka baddel lagusoo sameeyo halbeegyada/macaayiirta jaangoynaya Wada xaajoodka.

III. Waaxda farsmada waa in ay dib u eegis ku sameyso wax ka baddel kasta oo la soo jeediyay in lagu sameeyo halbeegyada/macaayiirta Wada xaajoodka, muddo toddoba (7) maalmood gudahooda, una gudbisaa codsiga guddiga Wada xaajoodka iyada oo ay weheliso talo-bixinahoodii Guddiga Qandaraasyada. Haddii Waxkabaddalka iyo dib u eegista la sameeyay ay waafaqasantahay shuruudaha lagu faah faahiyay faqradda (V) ee qodobka (4.3.1).

Guddidu waxay ku gaadhi doontaa go'aan muddo Afar iyo toban (14) maalmood gudahooda. Haddii ay ansixiyaan, waxay soo saari doonaan Halbeegyada/Macaayiirta Wada xaajoodka ee la cusboonaysiiyay, una gudbin doonaan Guddiga Wada xaajoodka. Tallaabooyinka (I) iyo (II) waa in lagu celiyaa ilaa heshiis laga gaarayo ama Guddiga wada xaajoodku ay soo gudbiyaan inaysan heshiis la gaarin mid ka mid ah qandaraaslayaasha.

IV. Marka la dhammeeyo wada hadallada, Guddiga wada-xaajoodku waa inay soo diyaariyaan warbixinta wada-xaajoodka si loo diiwaangaliyo natiijada kasoo baxday wada hadalladii la qabtay, Heshiisyadii la gaadhay iyo shuruudahii kama dambaysta ahaa ee qandaraaska. Warbixinta kama dambaysta ah ee Wada xaajoodka waa in ay ka koobnaataa:

- Nuqul ka mid ah heshiiska qandaraaska ee kama dambaysta ah;
- Isbarbardhigga labada heshiis (Heshiiska kama dambaysta ah iyo heshiiska guddidu qandaraasku hore u ansixisay) iyo Soo koobidda/ khulaasada wax-ka-beddelladii ugu muhiimsanaa ee lagu sameeyay;
- Soo koobidda kharashaadka maaliyadeed iyo deymaha joogtada ah ee ay dowladdu gashay, kuwaas oo ka dhashay heshiiskii qandraas ee kama damabysta ah.

V. Guddiga Wada xaajoodku waa inay u soo gudbiyaan warbixinta Wada xajoodka, Waaxda farsmada si ay talo uga siiyaan guddiga qandaraasyada in ay ansixiyaan ama diidaan. Muddo afar iyo taban (14) maalmood gudahood, waaxdu waa in ay dib u eegis ku sameyso warbixinta loo soo gudbiyay, una u gudbiso guddiga qandaraasyada iyada oo ay ku lammaantahay qoraal muujinaya haddii ay jiraan wax ka beddello aan waafaqsanayn halbeegyadi/ macaayiirtii Wada xajoodka ee hore guddidu u ansixisay, ama dabeecadda Mashruuca u baddelaya qaab;

  - u bandhigaya dawladda khataro badan,
  - kordhinaya kharashaadka maaliyadeed ama deymaaha joogtada ah, ama
  - Sababi kara, in mashruucu uu nodo mid aan la awoodi karin, oo aan la fulin karin dhaqaale ahaan.

Waaxda farsamada waxay usoo gudbinaysaa guddoomiyaha codsi muddo kordhin ah haddii ay jiraan isbeddello la taaban karo oo ku yimid hishiiska qandaraaska kama dambaysta ah oo u baahan dib u eegis qoto dheer. Haddii loo baahdo, Waaxda farsamada waa in ay la xidhiidho Agaasimaha Guud ee Maaliyadda.

VI. Guddiga qandraasyadu waa in ay qabato shir dib loogu eegayo, laguna ansixinayo warbixinta wada xaajoodka iyo heshiiska qandaraska. Guddidu waa in ay diiddo Warbixinta Wada xaajoodka haddii, heshiiska qandaraaska ee kama dambaysta ah:

- Ku jiro wax ka beddel aan waafaqsanayn Halbeegyadii/Macaayiirtii Wada xaajoodka ee la ansixiyay;
- Aanay suuragal ahayn in mashruuca lagu fuliyo qiimihii lacageed ee loo jaangooyay; ama
- Haddii, ay soo jeediso xubinta matelaysa wasaaradda maaliyaddu, in misaaniyadda dawladeed ee loo qoondeeyay, ama gacan siin kale, aanay ahayn imminka mid bixin karta, ama ay ka gudbayso xadkii ay u qorshaysay wasaaradda maaliyaddu.

VII. Guddiga qandarasyadu iyada oo adeegsanaysa waaxda farsamada, waa in ay soo saartaa go'aankeeda ugu dambayn muddo soddon "30" maalmood oo ka bilaabmaya maalinka ay heshay warbixinta Wada xaajoodka. Haddii guddidu ay diiddo warbixinta Wada xaajoodka, guddiga waa inay sheegtaa sababta warbixinta Wada xaajoodka ee kama dambaysta ah lagu diiday.

Guddiga Wada xaajoodku waxa ay dib u furi karaan Wada-hadallada qandaraaslaha la soo xulay iyagoo dib ugu celinaya habka kor ku xusan illaa warbixinta wada xaajoodka ayka ansixinayso guddidu ama Hay'adda wax iibsanaysa "Procuring entity" ama ay guddidu qandraasyadu ay go'aaminayso in aan wada hadal dambe dhici doonin.

### 4.8 Saxiixa Qandaraaska

I. Haddii guddiga qandaraasyadu ay ansixiso warbixinta Wada xaajoodka ee kama dambaysta ah, guddidu, iyada oo kaashanaysa waaxda farsamada, waa in ay qoraal ku ogaysiisaa hay'adda wax iibsanaysa "Procuring entity" ansixinta warbixinta Wada xaajoodka iyo hishiiska qandaraaska ee kama dambaysta ah. Markaa ka dib, si waafaqsan shuruudaha xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda, Hay'adda wax iibsanaysaa "Procuring entity" waa inay si cad ugu dhawaaqdaa go'aanka oo uu ogeysiisaa tartamaha guulaystay iyo tartamayaasha aan guulaysan labadaba. Afar iyo toban maalmood "14" ka dib soo saarista ogaysiiska bixinta qandaraska, wasiirka hay'adda wax iibsanaysa "Procuring Entity" waxa uu fulin karaa qandaraaska isagoo amraya in uu fuliyo qandaraaslahii ku guulaystay. Heshiiska qandaraaska waa inuu saxeexaa wakiil ka socda Hay'adda wax soo iibsaneysa "Procuring Entity" iyada oo uu markhaati ahaan ku saxiixayo Wasiirka maaliyadda XFS, si loo caddeeyo oggolaanshaha guddiga qandaraasyada ee warbixinta Wada xaajoodka iyo heshiiska qandraaska ee kama dambaysta ah.

II. Saxiixa heshiiska qandaraaska ka dib, hay'adda wax soo iibsaneysa "Procuring Entity" waa inay u gudbisaa nuqullada qandaraaska wasaaradaha, waaxyaha iyo hay'adaha ay khusayso iyo sidoo kale Waaxda farsamada iyo guddiga Qandaraasyada Intaa waxaa dheer, nuqul ayaa loo diri doonaa hanti-dhowrka guud si loo diiwaan geliyo, taas oo shardi u ah dhaqan galka heshiiska sida ku xusan xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda. Hanti-

dhawrku ma diiwaan gelin karo hishiisyada qandaraasyada aanu goob joog/ markhaati ka ahayn wasiirka maaliyaddu.

## 5. Fulinta Mashruuca

### 5.1 Korjoogtaynta Dhaqan-galka Qanadaraska

I. Ka dib fulinta hishiisyada qandaraaska, Hay'adda wax soo iibsaneysa "Procuring Entity" ayaa mas'uul ka ah hirgelinta mashruuca. Inta lagu jiro hirgelinta, hay'adda wax soo iibsatay waxay la wadaagi doontaa waaxda farsamada dhammaan warbixinnada maaliyadeed ee muhiimka ah iyo kuwa hawlgelinta ee uu u soo gudbiyo qandaraaslahu. Intaa waxaa dheer, hay'adda wax soo iibsatay "Procuring Entity" waa inay uu diyaarisaa warbixinta fulinta sanadlaha ah guddiga qandaraasyada, Warbixintaas oo faahfaahin ka bixinaysa horusocodka Mashruuca iyo wixii isbeddel ah duruufeed ama khatar ah ee ku yimi Mashruuca. Gudidu way u baahan kartaa warbixin aan caadi ahayn "Ad hoc updates" Xilli kasta. Warbixintani waa mid dheeraad ka ah warbixin kasta oo ay u baahan karto wasaaradda maaliyadda ee kor joogtaynaysa qandaraaska sida ku xusan Ballanqaadyada bixinta daymaha iyo daymaha ay suurtagalka tahay in la galo.

II. Guddidu waxa ay dhisi kartaa Guddi Maarayn Qandaraas oo heer sare ah, waxana madax u noqonaya hay'adda wax iibsanaysa "Procuring entity", laakiin waxa ku jira wakiillo ka socda waaxda farsamadda ee qandaraasyada iyo Hay'ad kasta oo uu khuseeeyo qandaraasku si ay ula socdaan waxqabadka mashaariicda iyo inay gacan ka geystaan go'aan ka gaadhista dhammaan arrimaha heshiiska.

### 5.2 Wax ka Beddelka Heshiisyada Qandaraasyada

I. Wax ka beddel lagu sameeyo heshiiska qandaraaska ayaa loo baahan karaa inta lagu jiro hawlgalka iyo fulinta mashruuca, taas oo ka dhalan karta isbeddelka duruufaha aan la filayn wakhtigii saxiixa heshiiska. Haddii ay dhacdo in hishiiska qandaraaska ay u badan tahay inuu u baahdo wax-ka-beddel, Hay'adda wax soo iibsanaysa "Procuring Entity" waa inay u soo gudbisaa codsi guddiga qandaraasyada iyada oo u maraysa waaxda farsmada, codasnaysana in salka loo dhigo halbeegyo Wada xaajood "Negotiation Benchmarks" oo ku habboon iyo asaasidda Guddi Wad Xaajood "Negotiation Team". Codsigu waa inuu si cad u qeexaa arrimaha la soo jeedinayo in dib looga wada xaajoodo iyo wakhtiga la filayo in la dhamaystiro wada hadaladaas.

Waaxda farsmada waa in ay dib u eegis ku sameyso codsiga hay'adda wax soo iibsatay "Procuring Entity" oo ay u gudbisaa guddiga qandaraasyada, iyadoo raacinaysa qoraal ku saabsan baaxadda Wada xaajoodka lasoo jeediyay, muddo Afar iyo toban "14" maalmood ah. Dib-u-eegiddu waa inay muujisaa haddii, soo jeedinta Waaxda farsamadu u aragto, in wax ka baddelka Wada xaajoodk "Negetition scope" ee la soo jeediyay uu

waafaqsanyahay baahiyaha Mashruuca iyo xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda, iyo in la muujiyo khatar kasta oo iman karta marka la eego awoodda Mashruucu kusii socon karo iyo in la tixigaliyay mabaadi'da Qiimaynta lacagta ah.

II. Ka dib marka guddigu ay hesho dukumentiyada la xiriira, iyo talada gudoomiyaha, Waaxda waa in ay qabato shir guddiga qandaraasyada ah si ay guddidu ugu go'aan gaaraan muddo 14 maalmood gudahood ah.

III. Guddigu waa in ay, iyada oo u sii maraysa waaxda farsmada ay ku soo saartaa ogaysiis qoraal ah oo ku socda hay'adda wax soo iibsanaysa "procuring entity" kaas oo ay ugu gudbinayso go'aankeeda. Haddii ogeysiisku yahay in codsiga Dib u xaajoodka "Re-negotiation" la diiday, waa in sababaha diidmadu ku xusnaadaan.

Si waafaqasan asbaabta diidmada, Hay'adda wax soo iibsanaysaa "Procuring Entity" dib way u habayn kartaa codsigeeda dib u xaajoodka ay ku dalbanayso, waxayna dib ugu gudbin kartaa guddiga iyada oo u sii maraysa waaxda farsamada si loo ansixiyo ama loo diido.

Haddii ogeysiiska guddidu uu muujiyo codsiga dib u xaajoodka la ansixiyay, waa in sidoo kale:

- qeexaa halbeegyada/Macaayiirta Wada xaajoodka khuseeya, oo ay ku jiraan arrimaha laga yaabo in loo tixgeliyo hab socodka Wada xaajoodka iyo wakhtiga Waqtiga Wada xaajoodka;
- magacaabista Guddiga Wada xaajoodka, oo, ay guddoomin doonto Hay'adda wax soo iibsanaysa "Procuring Entity", waana in ay ka kooban tahay ugu yaraan 3 xubnood, mid ka mid ah waa inuu noqdaa wakiilka waaxda Farsamada.

IV. Marka la ansixiyo, habka Wada xaajoodka waa inay raacaan nidaamka ku qeexan qodobbada 4.2-.4.3 ee la xidhiidha hishiisyada.

## 6.0 Siyaasadda iyo Hagidda Qandarasyada

I. Waaxda farsadmada oo ka amar qaadanaysa guddiga qandaraasyada ayaa mas'uul ka ah dhiraandhirinta iyo samaynta Siyaasadda iyo Hagaha qandaraaska, waxay sidoo kale si joogto ah guud ahaan u taageertaa samaynta shuruucda qandaraasyada. Haddii ay amarto Guddiga qandaraasyadu, wasaaradda maaliyaddu, ama la arko in ay jirto baahi loo qabo siyaasad iyo hage, waaxda farsamada waa in ay soo saartaa Dukumentiyo Siyaasad iyo Hage ah iyadoo guddiga tixgalinaysa. Waaxda farsamadu way qaadan kartaa la-taliyayaal ka taageera diyaarinta dukumentiyada Siyaasadda iyo Hagaha. Waaxdu waa in ay la tashataa daneeyayaasha la tashigaas oo la xiriira dukumentiyada Siyaasadda iyo Hagaha, hadba sida ku habboon ama sida ay guddidu ugu baahato.

II. Marka Qabyo-qoraalka Dukumentiyada Siyaasadda iyo Hagaha lala wadaago guddiga si ay dib u eegis ugu sameyso, guddidu waa in ay soo saartaa go'aan ay ku ogolaatay ama ku diidday dukumeentiyadaas muddo soddon "30"

maalmood gudahood ah. Haddii guddidu ay diido dukumeentiyadaa, waxay bixin doontaa sababo cad oo ku saabsan diidmada, si ay awood ugu siiso waaxda farsamada inay dib u eegto dukumeentiyada oo ay dib ugu soo gudbiso dib u eegis ka dib. Haddii guddidu ay ogolaato dukumeentiyada, waxa lagu daabici doonaa mareegaha wasaaradda maaliyadda.

III. Dukumentiyada Siyaasadaha iyo Hagayaasha qandarasyada ee laga yaabo inay soo saaraan guddiga qandaraasyada waxaa ka mid ah, laakiin aan ku koobnayn:

- Aqoonsiga Qandaraaska iyo xulashada Qandaraasyada;
- Nidaamyada wax iibsiga ee heshiisyada, oo ay ku jiraan adeegsiga wada xaajooddada iibka ka, iyo/ama samaynta dukumeentiyada tartanka ama shuruudaha.
- Samaynta heshiisyada qandaraaska, oo ay ku jiraan samaynta dukumentiyada hagayaasha ah ama shuruudo.
- Qiimaynta lacagta ah
- Maamulka qandaraasyada

IV. Iyadoo la raacayo xeerka maaraynta maaliyadda, wasaaradda maaliyadda ayaa sidoo kale samayn karta siyaasad iyo Hage la xiriira qiimeynta la awoodi karo isticmaalka Ballanqaadyada bixinta daymaha iyo daymaha ay suurtagalka tahay in la galo iyo maamulka Ballanqaadyada bixinta daymaha iyo daymaha ay suurtagalka tahay in la galo.

**Lifaaqa 1aad Qaab-dhismeedka Sharci ee Qandaraasyada**

1. **XEERARKA IYO XEER NIDAAMIYAASIYASHA SOO IIBSIGA/DIB U IIBINTA QANDARAAS EE DAWLADDA**

xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda, oo la dhaqan galiyay 2016, waxna laga beddelay 2020, waxa uu bixiyaa habraacyada soo iibsiga alaabta, shaqooyinka, adeegyada; soo iibsiga iyo maamulka lacagta mashaaricda qandaraasyada; iyo iska iibinta dukaamada aan la isticmaali karin, duugoobay, ama dheeraadka ah iyo qalabka hay'adaha dadweynaha. Waxa kale oo ay dhistaa hay'ado iyo guddiyo kala duwan oo looga baahan yahay in ay kormeeraan, nidaamiyaan ama si kale u taageeraan hirgelintiisa.

Ujeedooyinka guud ee xeerku waa:

- Kor u qaadida dhaqaalaha iyo wax qabadka, nidaamka wax soo iibsiga ee hay'adaha dawladda, iyo gaadhitaanka qiimaha ugu wanaagsan ee lacagta;
- Dardargelinta hufnaanta iyo tartanka xorta ah, iyada oo si siman loo bixiniyo fursadaha iyo macluumaadka tartanka;
- Dhiirigelinta daacadnimada, caddaaladda, aqoonta, iyo isla xisaabtanka si loo kordhiyo kalsoonida dadwaynaha ee nidaamka wax iibsiga; iyo
- fududaynta kor u qaadida warshadaha maxaliga ah iyo horumarinta dhaqaalaha.

Qaybta VI ee PPCDA waxay diiradda saartaa qandaraasyada waxayna abuurtaa hay'ado muhiim u ah, sida guddiga iyo waaxda farsmada waxayna qeexdaa nooca mashaariicda qandaras ee ay khusayso. Waxa ay soo bandhigtaa astaamaha muhiimka ah ee habka diyaarinta, soo iibinta, bixinta iyo hirgelinta mashaariicda qandaraasyada Waxa kale oo ay qeexdaa mas'uuliyadda hay'adaha soo iibinta iyo hay'adaha kale ee muhiimka u ah.

Tilmaamaha xusida mudan ee qaybta hishiisyada ee xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda waxaa ka mid ah tilmaamahan hoos ku xusan:

- Hay'adaha wax soo iibinsanaya ayaa mas'uul ka ah diyaarinta, soo iibsiga iyo hirgelinta heshiisyada mashariicda qandaraas.
- Guddiga oo ay taageerayso waaxda farsamadu , waa hay'add kormeer taas oo xaqiijisa marka lagu gudo jiro marxaladaha kala duwan ee shaqada, in diyaarinta, soo iibsiga iyo hirgelinta heshiisyada qadnaraas loo fuliyay si waafaqsan xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda; iyo
- In tartanka furani yahay habka wax iibsi ee rasmiga ah.

Xeerarka wax soo iibsiga, qandaraasyada iyo iska iibinta ee dawladda, waxa la ansixiyay 2020, waxa aanay u adeegayaan in ay bixiyaan tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan doorarka hay'adaha, qeexaanna qaybo ka mid ah diyaarinta, soo iibsiga iyo hirgelinta mashruuca qandaraas. Waxaa xusid mudan:

- In uu bixiyo tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan hawlaha guddiga iyo waaxda farsamda, marka la joogo dib u eegista dukumeentiyada qandaraaska iyo xaqiijinta u hoggaansanaanta halbeegyada gorgortanka;

- In uu faahfaahiyo habraaca tixgalinta la siinayo codsiyada aan la dalban, kuwaas oo waafaqsan shuruudaha xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda;
- In uu bixiyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha nidaamka wax iibsiga;

## 2. XEERKA MAAMULKA MAALIYADA DAWLADA (XMMD)

XMMD waxaa la dhaqan galiyay sanadkii 2019-ka, waxaana u maamulaa dhammaan arrimaha la xidhiidha maamulka maaliyadda guud ee Soomaaliya. Waxa uu dejiyaa habraacyada iyo mabaadi'da aasaasiga u ah diyaarinta, ansixinta iyo dhaqangelinta miisaaniyadda qaranka, kontaroolada gudaha, xisaabaadka, warbixinta iyo hanti-dhawrka dakhliga, kharashaadka, hantida iyo deymaha, iyo sidoo kale maaraynta deymaha dawladda iyo dammaanad qaadka dawladda.

Si gaar ah, XMMD waxay siisaa awoodda Wasiirka Maaliyadda marka ay noqoto maareynta maaliyadda guud. Tan waxaa ku jira mas'uuliyadda (i) dhammaan arrimaha siyaasadda iyo farsamada ee la xidhiidha habsami u socodka nidaamka maamulka maaliyadda dawlada.
(ii) maamulka lacagta dawladda; (iii) kala-talinta DFS kheyraadka loo qoondeynayo barnaamijyada ay bixinayaan waaxuhu; iyo (iv) hubinta joogtaynta iyo saxsanaanta maamulka lacagta dawladda[9].
Waxa kale oo ay caddaynaysaa in Wasiirka Maaliyaddu keeligii leeyahay awoodda amaah qaadashada; gude iyo dibadba, isaga oo matalaya DFS, waxa aanay si cad u sheegaysaa in aanay jirin Hay'ad Dawladeed oo aan ka ahayn Wasaaradda Maaliyadda oo dibadda wax amaah ah ka qaadan kartaa[10]. Maamul gobaleedyada federaalku wax amaah ah kama qaadan karaan dibadda, balse Wasiirka Maaliyadda ee Federaalka waxa uu damiinan karaa maamuladaas si ay amaah uga qaataan dibadda.

XMMD waxa uu ku dabaqmayaa mashruuc kasta oo faa'iido u leh: (i) miisaaniyadda dawlada; (ii) hantida guud; iyo, (iii) dammaanad qaadka dawladda ama deymaha kale ee ka kooban. Tani waxa ay ka dhigan tahay in heshiisyada qandaraasyada mashaariicdu guud ahaan ay hoos yimaadaan shuruudaha XMMD, iyaga oo guud ahaan:

- Ku lug lahaaanshaha isticmaalka hantida guud, ha ahaato dhul ama dhisme, ama hantida aan la taaban karin sida xuquuqda kootada ee cid loo xidho wax gaar, ee lagu abuuray heshiisyo qandaraas.
- Saamaynta Miisaaniyadda Dawladda, iyada oo loo marayo lacagaha tooska ah ee dawladda ama qoondaynta ilaha dakhliga ee cid gaar ah taas oo haddii kale u soo baxda dawladda;
- Ku lug lahaanshaha deymaha oo ay ku jiraan dammaanad-qaadyada ama bixinta magdhowga suuragalka ah.

XMMD waxa uu dhigayaa in iyadoo Wasiirka Maaliyaddu uu leeyahay awoodda amaah qaadashada iyo dammaanad bixinta, haddana deynta ama dammaanadda waa in uu

---

[9] Qod 8aad ee XMMD
[10] Qod 36aad ee XMMD

ansixiyaa baarlamaanku. Sidoo kale, Wasiirka Maaliyaddu oo kaliya ayaa ansixin kara cashuur dhaafka[11] .

i. Xeer nidaamiyaaha XMMD ee 2022, waxa uu dejiyaa habraacyadda, sida
ii. diyaarinta miisaaniyadda;
iii. fulinta miisaaniyadda iyo maaraynta kharashaadka;
iv. maaraynta deynta
v. Xisaabaadka iyo warbixinaha ku saabsan
vi. xakamaynta iyo hantidhawrka gudaha;
vii. maamulka hantida guud.

Waxa ka mid qayb ku saabsan maaraynta maalgashiga dawladda (Qaybta XII), taas oo ku habboon qandaraasyada, taas oo hagta:

i. ku dhaqanka xeerarka mashaariicda maalgashiga guud ahaan,
ii. mabaadi'da midaynta miisaaniyadda,
iii. xaqiijinta awoodista mashruuca,
iv. Shuruudaha qoraalada waajibka ay tahay in la kaydiyo.
v. heshiisyada qandaraasyada
vi. iyo is bedelada ku yimaadda mashariicda

Dhanka Miisaaniyadda, shuruudaha XMMD waxa ay baahan yihiin in wasiirku diyaariyo qaab-dhismeedka siyaasadda maaliyadeed ee sannadlaha ah, taas oo dhigaysa xadka kharashaadka iyo mudnaanta dawladda[12]. XMMD waxa kale oo ku cad baahida loo qabo in miisaaniyadda qaranka lagu daro macluumaadka kharashyada dibadda laga soo maalgeliyo iyo in la taxo ballan-qaadyada la filayo sannadlaha ee weli jira, deymaha iyo deymaha joogtada ah[13]. Xagga xilalka xeer-hoosaadku waxa uu tilmaamayaa in shuruudaha ballan-qaadyada sannadlaha ah ay tahay in uu ansixiyo Wasiirka Maaliyaddu, isla markaana aan la gelin kharash la'aan Miisaaniyadda Qaranka.

[11] Qod 37aad ee XMMD

[12] Qod 5aad ee XMMD
[13] Qod 8aad ee Xeer-nidaamiayaha XMMD

**Lifaaqa 2aad: Mashaariicda Qandaraasyada**

Qodobka 3aad ee xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda waxa uu ku qeexaa Qandaraasyada "Wareenjinta ay wareejinayso hay'ad dawli ah hanti dawladeed ayna u wareejinayso hay'ad an dawli ahayn, iyadoo la galaysa heshiis muddo leh, Muddadaas waxa hantida maamulaysa, ka shaqaysiinaysa, ka faa'iidaysanaysa, hagaajin karta ha'yaddaas aan dawliga ahayn ee gacanta ku haysa, iyadoo bixinaysa muqaabil lacageed, ama faa'iido kale, sida lagu qeexay shuruudaha heshiiska qandaraaska ".

Qeexitaankan waa la sii faahfaahiyay:

- Waa Liistada heshiisyo noocyo kala duwan ah oo si toos ah loogu tixgaliyay qandaraasyo kuwaas oo dhinacyo badan koobsanaya, laga bilaabo bar bilowga raadinta debadeed ilaa qaababka kale ah ee Iskaashiga hay'adaha dawladda iyo kuwa Rayidk ah . Liiska heshiisyadani waa mid aan xaddidinayn waxaana awooda la siiya guddiga qandaraasyada si ay u aqoonsato habab ganacsi oo kale oo qandraas ahaan loo tixgalin karo.

- Dhaqdhaqaaqyo kala duwan oo xaga dhaqaalaha ah oo ay ka mid yihiin sida sahaminta gaaska saliida, soo saaridda, iyo wax soo saarka kheyraadka beeraha oo laga yaabo in laga horumariyo Mashaariicda Qandaraasyada Dheef-wadaaga

- ayaa iyana mashaariicda qandarasyada lagasoo dheegan karaa ama lagasoo dhiraandhirin karaa. Liistadan ayaa ah mid aan dhamaanayn, waxaana awoodda la siiyay Golaha Wasiirada si ay u balaariyaan liistada una kordhiyaan liistada.

Qeexidda qandaraaska marka la tixraacayo sharciyada Soomaaliya wuxu waafaqsan yahay oo la mid yahay qeexitaanka Iskaashiga hay'adaha dawladda iyo kuwa Rayidk ah (PPP's) Ma jiro qeexitaan caalami ah oo la isla waafaqsanyahay/Oggolyahay oo uu leeyahay iskaashiga hay'adaha dawladda iyo kuwa Rayidka/gaarka loo leeyahay "PPP". Si kastaba ha ahaatee, Heshiiska Iskaashiga u dhexeeya Hay'adaha dawladda iyo kuwa Rayidka ah (PPP) waxa lagu qeexi karaa, heshiis muddo dheer ah oo u dhexeeya hay'ad dawli ah oo wax soo iibsanaysa "Procuring entity" ama qandaraas bixiye ah iyo dhinaca labaad oo Rayid ah, taas oo dhinaca rayidka ah uu qabanayo:

- Hawl dawladeed ama uu bixinayo adeeg uu ku matelayo hay'addii dawliga ahayd ee uu qandraaska ka qaatay
- Faa'iido uu ka helayo gudashada/qabashada hawl dawladeed ama bixinta adeeg dawladeed, siyaabahan midkood;
- Gunno hawleed ay siinayso Hay'addii dawladeed "procuring entity" ee heshiisku u dhexeeyay.
- Khidmado uu ka qaadanayo macaamiisha uu siinayo adeegga ama uu u qabanayo hawsha; ama
- Isku darka labada qodob ee sare, (gunno hawleeddaasi iyo kharashyada ama khidmadahaas macamiisha); iyoDhinaca Rayidka ah, guud ahaan waxa uu masuul ka

yahay khatar kasta oo ka iman karta gudashada shaqooyinkaasi iyada oo la raacayo shuruudaha heshiiska qandaraaska.

Sida caadada ah, mashruuc loo tixgalinayo qandaraas ahaan marka la joogo sharciga Soomaaliya waxaa loo tixgelin doonaa in uu yahay Iskaashiga Hay'adaha Dawladda iyo kuwa Rayidka ah "PPP" inta u badanna saas ayaa maamulada looga yaqaan. Erayga "PPP" ayaa aad loo adeegsadaa marka laga hadlayo noocyada mashaariicda hoos yimaadda PPCDA. Si kastaba ha ahaatee, ereyga qandaraas waa erey lagu xusay sharuucda Soomaalida ee jira, sidaa awgeed, habraacyadani waxay isticmaalaan ereyga Qandaraas

**Lifaaqa 3aad Oggolaanshaha Qandaraaslaha iyo Marxaladaha Mashariicda.**

| Ansixinta | Dukumentiyada Loo Baahan Yahay | Doork waaxd Farsamada | Doorka Guddiga |
|---|---|---|---|
| Shahaadada Qandaraaska | Fikradda Guud ee Mashruuca (Lifaaqa 4aad) | La talinta wasiirka maaliyada kaas oo bixinaya ama diidaya shahaadada qandaraaska sago latashanaya Agaasimaha Guud ee Wasarada | Hadii aya tahay Marshuuca aan la codsan, Asixinta ama Diidida kaas o yimi codsi wasiirka Maaliyadda |
| Dhukumitiyadada Tarranka Qandaraaska | I. Shahaadada Qandaraaska<br>II. Daraasada Suutagalinada ee Qandaraaska (Lifaaqa 5aad)<br>III. Dhukumiyadda Tarranka Qandaraaska (Lifaaqa 6aad)<br>IV. Warbinta Dhukimiyada Qandaraaska (Lifaaqa 7aad) | I. Dib u eegista Dhukumitiyada ee ansixnmada muddo 7 maalmood gudduhood<br>II. Diyarinta warbinta lagu taliyey in la aqbalo am la diido muddo 45 maalmood. Isaga ooo ogaanaya ra'iyiga Agasimaha Guud ee u awood helida iyo FCCL ee Tartamaha. | I. Ansixinta ama diidida 30 Malmood gudihii<br>II. Guddidu waxay ansixin karaaan oo kaliya markaa mashruuca buuxiyo shurudaah u Awood helida ama FCCL siduu ku go'aamiyo Agaasimaha Guud ee Wasarada |
| Guddiga Qiimaynta | Hay'ad soo iibinaysa wa in | Waxdu waxay | Guddidu waxay |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Qandaraasyadda | ay ogaysiiso Waaxda farsamda 30 maalmood ka hor taariikhda soo gudbinta kowaad | codisga gudbineysa guddiga | magacaabaysa Guddiga Qiimaynta |
| Warbixinta Qiimaynta, Halbeegyada gorgortanka, iyo Kooxda gorgortanka | Warbixinta Qiimaynta (Lifaaqa 8) xaajoodka ee codsiga | So jeedinta ansixinta ama diidmada warbixinta qiimaynta iyo Marxalada gorgortanka 14 maalmood gudahood | So jeedinta ansixinta ama diidmada warbixinta qiimaynta 14 maalmood gudahood. Marka la ansixiyo, soo saarista halbeegyada gorgortanka iyo magacibidda kooxda gorgortanka. |
| Gorgortanka qandaraaslaha xiga, iyo Halbeegyada gorgortanka | ……………Codsiga | Soo jeedinta aqbiladda ama diidmada | Iney ku ogoladaan ama diidan muddo 14 maalmood gudahood. Hadii loo baahdo waxay dib u raacayan halbeegyada gorgortanka. |
| Warbixinta gorgortanka iyo Hishiiska qandaraaska | Warbixinta Wada xaajoodka Hishiiska qandaraaska kama dambaysta ah | ku talinta ansixinta ama diidmada warbixinta gorgortanka iyo heshiiska qandaraasyada kama dambaysta ah 14 maalmood gudahood | I. Ansixinta ama diidida 30 Malmood gudihii<br>II. Guddidu waxay ansixin karaaan oo kaliya markaa mashruuca buuxiyo shurudaah u Awood helida ama FCCL siduu ku go'aamiyo Agaasimaha Guud ee Wasarada<br>3. Wasrada maaliyada ayaa marqati ka noqon doonta saxiixa hishiiska qandaraaska |
| Halbeegyada dib u gorgortanka iyo kooxda gorgortanka | Codsiga dib u gorgortanka | Ka talintat Guddiga codsiga iyo xayndaabka gorgortanka 14 maalmood gudahood | In la ku oggolado ama ku lagu diido codsiga 14 maalmood gudahood. Marka la ansixiyo, so saarista halbeegyada gorgortanka oo la magacaabo kooxda gorgortanka |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Wax ka Beddelka Hishiiska Qandaraaska | Warbixinta Wada xaajoodka Hishiiska Qandaraaska oo dib loo eegay | Ku taliyaa n ansixinta ama diidmada warbixinta gorgortanka iyo qandaraaska ka tanaasulida dib loo eegay 14 maalmood gudahood | I. Ansixinta ama diidida 30 Malmood gudihii<br>II. Guddidu waxay ansixin karaaan oo kaliya markaa mashruuca buuxiyo shurudaah u Awood helida ama Ballanqaadyada bixinta daymaha iyo daymaha ay suurtagalka tahay in la galo siduu ku go'aamiyo Agaasimaha Guud ee Wasarada<br>I. Wasrada maaliyada ayaa marqati ka noqon doonta saxiixa hishiiska qandaraaska |

**Lifaaqa 4aad: Fikradda Mashruuca Qandaraaska**

**Qoraalka fikradda mashruucu waa in ay ka koobantahay ugu yaraan:**

I. Faahfaahinta Hay'adda wax soo iibinaysa "Qandraaska bixinaysa" iyo sababta mashruucani u noqday mid awooddeeda hoos taga.

II. sharraxaadda mashruuca, oo ay ku jiraan:
- Waaxda iyo nooca Mashruuca;
- Doorka u ku leeyahay iyo waajibaadka ka saaran, qandraaslaha rayidka ah;
- Goobta Mashruuca loo qoondayey;
- Liiska hantida dawladeed ee mashruuca loogu baahan karo;
- Faahfaahinta taageero kasta oo dawladdeed oo mashruucu helay, oo ay ka mid yihiin lacag-bixinno toos ah, tabarucaadyada, dammaanad-qaadyo ama abaalmarinno; iyo
- Muddada loo qoondeeyay qandaraaska.

III. Qiimaynta hordhaca ah ee lagu qiimaynayo baahida dadwaynahu u qabo Mashruuca, oo ka kooban; faa'iidooyinka uu u leeyahay bulshada iyo la jaan-qaadka qorshaha horumarinta qaranka;

IV. Qiimaynta hordhaca ah ee suurtogalnimada dhaqaale iyo awood-u-helidda mashruuca ama falanqaynta faa'iidada oo la barbardhigay kharashka;

V. Faahfaahinta hordhaca ah ee sidii loo farsamayn laha mashruuca la qorsheeyay,farsamadaas waa in xidhiidh la yeelataa hantida iyo adeegyada jira

VI. Qiimayn horudhac ah oo ku saabsan sababta uu Mashruucu u gaadhi karo qiimo lacageed, ayna tahay in qandraas ahaan loo fuliyo; iyo

VII. Qiimaynta horudhaca ah ee khatarta soo wajihi karta mashruuca.

**Lifaaqa 5aad: Suurtagalnimada Qanadaraska**

I. Daraasadda suurtagalnimada waa inay ka kooban tahay:
- Macluumaadka ku saabsan sifooyinka iyo astaamaha muhiimka ah ee mashruuca;
- Caddaynta faa'iidooyinka istaraatiijiyadeed iyo hawleed ee mashruuca kuwaas oo la xiriira yoolalka mashruuca;

II. Qodobbadan gaarka ah waa in la qeexaa;
- Haddii shaqo la qabanayo, nooca shaqada, iyo cidda Rayidka ah ee qabanaysaa xaddi intii leeg ayay ka qabanaysaa;
- Qaabka, nashqadda iyo astaamaha gaarka ah ee laga rabo maxsuulka ama natiijada, Tani waxay gaar u tahay kaabayaasha dhaqaale iyo hantiyaha kale ee la dhisayo ee qaybta ka ah mashruuca;
- Shuruudaha ganacsi ee la qorsheeyay, oo ay ku jiraan khidmadaha,cashuuraha ama kharashyada laga yaabo in uu dhinaca rayidka ah helayo.
- Haddii ay tahay hantidu mid dawladeed, adeegsigeeda, faahfahinta siyaabaha kala duwan ee loo adeegsanayo iyo cidda adeegsan karta hantidaas,
- Hay'adda wax soo iibsanaysa "The procuring entity", waa in ay caddaysaa in ay awood u leedahay oo fulin karto mashruuca, haddii ay dhacdo in ay gasho kharashaad maaliyadeed ama ay doonto inay lacag ka qaaddo macaamiisha ,
- Waa in la faahfaahiyaa, haddii ay jirto taageero ama ballanqaad maaliyadeed oo dawladeed, (sida abaalmarinaha, ballan-qaaddo maaliyadeed oo gaar ah ama dammaanado)

III. Sida dhinacyada loogu khasaare soorayo khataraha, hawleed, maaliyadeed afarsamo ee mashruuca soo waajaha;

IV. Caddaynta qiimaha lacageed ee la filayo in laga helayo mashruuca, iyad oo lagu saleeyay qiimayntii kasoo baxday is barbardhigga kharashka loo qoondeeyay maaraynta khataraha si loo hirgaliyo mashruuca iyo ka iibka caadiga ah ee soo jireenka ah.

V. Qiyaasta raasamaalka maalgalineed ee Mashruuca;

VI. Iibka, hirgelinta iyo qorshaha hawlgalka mashruuca;

VII. Qiimaynta farsamada iyo dhaqaalaha mashruuca;

VIII. Faahfahinta, qiimaynta saamaynta mashruuca ee deegaanka iyo bulshada;

IX. Faahfaahinta natiijada ka soo baxday wada tashi kasta oo daneeyayaayeesha mashruucu yeesheen ama xogta suuqa laga helay oo qayb ka ahaa daraasadda suurtogalnimada mashruuca iyo marxaladdii qiimaynta mashruuca;

X. Habka muwaadiniinta Soomaaliyeed awood siin loogu samayn karo looguna dhiirrigalin karo ka qayb qaadshada Mashaariicda; iyo

XI. Macluumaad kasta oo kale oo la doonayo in lagu kaabo daraasadda suurtogalnimada mashruuca.

**Lifaaqa 6aad: Dukumentiyada Qandaraaska**

Dukumeentiyada tartanka qandaraasku waa in ay ka koobnaadaan ugu yaraan:

I. Xasuusqorka macluumaadka mashruuca, kaas oo dabooli doona qodobbadan soo socda laakiin aan ku koobnayn:

- Sooyaalka taariikheed ee Mashruuca;
- Ujeedooyinka looga gol leeyahay mashuraaca;
- Horumarinta laga filayo iyo hirgalintiisa; iyo
- Qodobaynta natiijada Mashruuca laga filayo iyo halbeegyada lagu cabbirayo in la gaaray ujeedooyinkii/Yoolashii laga rabay;

II. Dukumeentiga tartanka oo ay ku jiraan codsi qabyo qoraal ah ah oo dhamaystiran iyo sidoo kale dukumentiga tartanka ee kale ee khuseeya mahruuc gaar ah, kaasi oo ka koobsanaya Codsiga muujinaya Danaynta mashruucaasi, Caddaynta khibradda iyo waxyaabaha kale ee ku habboon. Dukumeentiyadani waa in si cad looga arkaa habka wax iibsiga ee loo soo qorsheeyay mashruucan waxayna ku koobnan doonaan:

- Caddayn sheegaysa haddii uu jirey kulan ka horreeyay tartanka iyo inkale, haddii kulankaasi jirey , waa in la xusaa taariikhda, wakhtiga iyo goobta;
- Buuxinta shuruudaha u suuragalinaya farsamo ahaan iyo maaliyad ahaanba qiimaynta iyo bixinta qandaraaska.
- Dhammaan foomamka muhiimka ah ee lagama maarmaanka u ah soo gudbinta qandaraasyada, oo ay ka mid yihiin: warqadda dalabka, foomamka ay ku xusanyihiin khibradda farsamo iyo awoodda maaliyadeed, foomka dammaanadda iyo dammaanadda qabashada mashruuca, iyo wax kasta oo kale ee ku habboon.
- Waqtiga iyo goobta lagu soo gudbin karo iyo furitaanka qandaraasyada.

III. Heshiiska Qandaraas oo dhammaystiran wuxu ka koobnaan doonaa:

- Xuquuqaha, masuuliyadaha iyo waajibaadka dhinacyada;
- Summadaha waxqabadka ugu yar iyo halbeegyada laga qiyaas qaadanayo marka la cabbirayo, kuwaas oo si cad oo faahfaahsan u qeexaya nooca adeeg ee aqbalayaan ama rabaan Hay'adda qandraaska bixisay "The procuring Entity).
- Kharashyada iyo khidmadaha la qaadi doono iyo wixii isbadallo ah ee lagu sameenayo shuruudaha.
- FCCL-ka cidda wax soo iibsanaysa ama dawladda;
- Lahaanshaha hanti kasta oo loo adeegsaday mashruuca, ku gudo jirka heshiiska, iyo hadduu dhammadoba.
- Baahida loo qabo, Diiwaangelinta iyo diyaarinta warbixinnada marxalad laha ah ee maaliyadeed iyo waxqabad ;
- Haddii ay dhacaan khaladaad ka yimaadda labada dhinac, habka soo af meeridda heshiiska "Early termination" haddii aan khaladaadkii la mag dhabin ama haddii ay gadaal kasoo korodho xaalad awoodda dhinacyada ka baxsan"Force majeure" oo sii jiitantay/daba dheeratay; iyo,
- Qeexitaanka xeerarka iyo shuruucda lagu maamulayo heshiiska iyo hababka xallinta khilaafaadka.

**Lifaaqa 7aad : Wargalinta Waxda Farsmada ee Qandraasyada ee ku saabsan Dukumeentiyada Tartanka Qanadarasyada**

| **Warbixinta Muhiimka u ah Mashruuca** | |
|---|---|
| Magaca Mashruuca | |
| Faahfahinta Mashruua | [Sharaxaad ka bixi sifooyinka muhiimka ah ee Mashruuca. Si cadna u sheeg haddii Mashruucu yahay USP.] |
| Xaalka Mashruuca | I. [ In uu heysto shahaadda Qandaraaska ee ku taariiksan... haddii USP, uu ogolaanshaha ka helay Guddiga ee ku taarikheesan .<br>II. Ma haysto dhammaan dukumeentiyada mashruuca ee loo gudbinayey Waaxda Farsmada oo ay ku jiraan daraasad dhammaystiran oo suurtagalnimada ah iyo dukumeenti qandaraaska oo dhammaystiran.<br>III. In waaxda farsmadu ku lug layd diyaarinta dukumentiyada Mashruuca iyo in kale |
| Qiyaasta Qiimaha maal Galinta | |
| Talo so jeedinta Waaxda Farsmada | Sheeg talo bixinta waaxda ay kula talisay Guddiga inay ansixiso ama diido mashruuca iyo asbaabta ka talo bixinta. |
| Qaabka Mashruuca | |
| Tilmaaha Farsamadda Mashruuca | Ka bixi Faahfaahin cad oo ku saabsan in la hormariyey iyo in kale hantida kaabeyaasha dhaqaalaha ama adeegga guud ee ay bixiso cidda gaarka ahi. |
| Tilmaaha Suurtigalnimada Mashruuca | [Sharaxaad ka bixi haddii tilmahaha farsamo ee loo baahan yahay iyo ujeedooyinka Mashruuca la muujiyey si loo gaari karo iyadoo la adeegsanayo tignoolajiyada marka la heli karo]<br><br>Sheeg Khatarta farsamada ama hawlgal mashruuca hadii la garanayo |
| Asaaska Ganacsiga iyo Suurtagalinamda Maaliaydeed | [Sharaxaad ka bixi isha( ilaha) dakhliga ee ciida gaarka leeyahay iyo in ilahan la ogaaday inay ku filan yihiin ciida gaarka iney soo saarto dakhli ku haboon, laakiin aan xad dhaaf ahayn, soo celinta maalgashigeeda. |
| FCCLs | [Mashruucu wuxuu ku lug leeyahay FCCL-yada soo socda: iyado ay ku jirto waajibaadka gaarka ah:<br>I. Ballanqaadyada maaliyadeed (lacag bixinta dawladda ee la soo jeediyay, wareejinta hantida dawladda, ama qoondaynta dakhliga dawladda);<br>II. Waajibaadka joogtada ah (dakhliga/mugga ama dammaanadda kale, ballanqaadyada magdhowga, iwm.). |

| | |
|---|---|
| | III. [FCCLs waxaa dib u eegis ku sameeyey maamulka deymaha iyo waaxaha miisaaniyada ee Wasaaradda Maaliyadda oo sida uu so jeeediryey Agaasimaha guud ee Maaliyaddu iney buuxiyeen ama anaay buuxin shuruudaha la lagu waajibiyey. Ka bixi tafaasil ay shuruudaha lagu waajibiyey ku aya ka so bixi kariwayeen. |
| Asaaska Sharci | I. Hay'adda wax soo iibsaneysa waxay awood sharci u leedahay iney bixiso mashaaricda hantida kaabayaasha ama adeegga dadweynaha iyo inay u igmato cid gaar ah.<br>II. Hay'adda wax soo iibsanaysa waxay kaloo awood sharci u leedahay inay ka soo baxdo waajibaadkeeda ku xusan heshiiska qandaraaska. |
| Hishiiska Qandaraaska | I. [In Heshiiska qabyo qaraalka ah ee qandaraaska uu waafaqsan yahay shuruudaha qaabdhismeedka uu si habboon u daboolayaa waxyaabaha looga baahan yahay sharicga PPCDA iyo Habraacyada Guddiga ]<br>II. In Waajibaadka cidda wax soo iibsanaysa iyo lammaha gaarka eh ee wada shaqaaynta Hay;ada ah si cad loo qeexay. Faafahin kooban ka bixi waajibadka ugu muhiimsan dhinacyada. |
| Qoodaynta Khartaraha | Hishiiska qandaraaska waa inuu si u qeexa Qandaraaska qeexayaa khataraha ku wajahan dhinacyada gaarka ee wada shaqaynta ka dhaxeesa Hay'ada iyo hayy'ada wax soo iibinaysaa si looga midho-dhaliyo ujeedooyinka Mashruuca iyo ilaalinta danaha dawladda.<br>sheeg Khataraha loo qoondeeyay iney dhici karaan guddashada mashruuca |
| Qiimaha lacagta | Iyadoo lagu saleenayo qoondaynta khatarta mashaariicda, maalgelinta la filayo, kharashaadka hawlgelinta iyo dakhliga, bixinta Mashruuca ee Qanadaraaksa ma muujineyso awoodda lagu dhalin karo Qiimaha Lacagta.<br>Sheeg Qodobbada lagu ogaaday awood la'aan xogta ugu muhiimsan iney lacagta laga dhalin Karin mashruuca qandaraas. |
| Saamaynta Mashruuca ee Bulsho & Dhaqaale | Saamaynta dhaqaale ee bulsho ee Mashruuca waa la qiimeeyay oo si fiican loo fahmay. Saamaynta uu mashruuca qandaraas ah waxaa ka mid ah:<br>I. Sheeg nuxurada daneeyayaasha mashruuuca ee la qabtay taariikhda.........................<br>II. waxaana lagu muujiyay fikradaha soo socda ee daneeyayaasha:] |
| So jeedinta Habka soo iibsiga & dukumentiyad Qandaraaska | |
| Habka soo Iibsiga | Hadii aanu ahayn tartan qandaraas oo fuaran. Hab noocee ba la isticmaalay mise ma yahay habka ugu haboon ee Hay'adu wax ku iibsaneyso |

| | |
|---|---|
| Habka loo Marayo | [Si loo tilmaamo marxaladaha hindisada la raacayo, haddii ay jiri doonaan REOI, RfQ, RfP, iwm. iyo jadwal qiyaas ah oo isku mid ah.<br><br>Sharaxaad ka bixi sida mashruuca loo bixinayo: Tusaale habka caadiga ah wuxuu noqon doonaa bixinta mashruucu ee uu ku salaysan yahay inuu ka gudbay ama ka so gudbiwayey shuruduhi oo ay ku xigto soo jeedin farsamo iyo mid maaliyadeed oo dhibco lagu bixinayo taas oo lagu soo gudbiyey iyadoo gal ku jiraan oo xiran. Soo jeedinta farsamada ayaa marka hore la qiimeyn doonaa, soo jeedinta dhibco farsamo ee guddidu u cayimtay………………. Uu buuxin waayo lama tixgelin doono mana la furi doono dalabaadkooda maaliyadeed.<br><br>Dalab lacageedku waxa uu ku salaysan yahay halbeeg dhaqaale oo tartan lacageed ah halka ay suurtagal tahay. Qandaraaslaha guuleysanaya ayaa lagu txigalinaya dhibcaha ugu badan marka la isku daro ee uu ka farsamada iyo maaliyadda halkaasoo isku gaynta dhibcaha farsamada uu yahay…………….. c isku gaynta dhibcaha maaliyadeedna uu yahay<br><br>In Jadwalku ku habboon yahay nidaamka iyo Mashruuca la soo socdsay |
| Dukumeentiga tartanka | In dukumeentiyadu si cad uu waafaqayaan yihiin shuruudaha Xeerka soo iibsiga, qandaraaska iyo iibinta hantida dawladda iyo Habraacyada guddiga . Sheeg shuruudaha ay buuxin kari waayen ee la xariira mashruuca, ku dar liis tilmaamaya cilladaha. Si gaar ah u fiirso haddii:<br>• Shuruudaha iyo Habka qiimaynta ee heer kasta oo ka mid ah geeddi-socodku ujeeddo Mashruuca.<br>• xidhidhka wada shaqeened intii gorgortanku lagu jiray aha mid sax ah iyo in kale iyo inuu laf dhaf iyo taagero u ahaa hishiika qandaraaksa .<br>• In Qandaraasyada shuruuda la ogolaaday iyo in kale |

**Lifaaqa 8aad: Warbixinta Qiimaynta Tartanka.**

Warbixinta qiimaynta tartanka waa in ay ka kooban tahay ugu yaraan kuwan soo socda:

I. Warbixn kooban oo ah codsiyada la helay marxalad kasta oo geeddi-socodka iyo qiimaynta jawaab-celintooda iyadoo lagu salaynayo shuruudaha la hordhigey codsidga;
II. Ka hor ka bixi sharraxaadda ilaa xadka uu qandaraasle kastaa muujiyey in ay buuxisay shuruudihii hore ee u-qalmitaanka iyo natiijooyinka u-qalmitaanka ka hor (halka ay khusayso);

III. Shuruudaha qiimaynta ee loo isticmaalay in lagu qiimeeyo ka jawaabista dalabka iyo dhibcaha.

IV. Faahfaahinta caddaynta codsiga cidda mashruucaay raadisay GQQ iyo jawaaabaha ay ka bixiyeen oo laga jawaabayo caddaynta;

V. Natiijooyinka qiimaynta farsamada, oo ay ku jirto qiimaynta codsi kasta marka loo eego shuruudo kasta oo qiimayn farsamo oo ku filan in lagu caddeeyo dhibcaha loo qoondeeyay soo codsiga mashruuca ee lo xilsaaya GQQ

VI. natiijooyinka qiimaynta maaliyadeed;

VII. Magaca qandaraaslaha dhibcaha ugu badan helay (sida waafaqsan shuruudaha qiimaynta ee ku xusan dukumeentiyada tartanka);

VIII. Magacayada tartamayasha labaad iyo saddexaad ee helay dhibcaha ugu badan (sida waafaqsan shuruudaha qiimaynta ee ku xusan dukumeentiyada tartanka); iyo,